

ASTAAMAHA GUUD EE MAANSADA SOOMAALIYEED

Qore

Cabdalla Cumar Mansuur

XAMAR

1977

G O G O L D H I G

Kaddib markii ay soo bandhigeen labada aqoonyahan, Cabdullaahi Diiriye Guuleed iyo Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye), hawshii qiimaha lahayd oo ah xeerkaa miisaanka maansada soomaaliyeed, waxaa igu dhashay in aan sii ballaariyo buuggayga qalinjebinta oo aan diyaariyay 1974-5.

Buuggaas oo aan kaga hadlayay inta nooc ee maansada soomaaliyeed ay u kala baxdo iyo waxyaabaha u gaarka ah iyo qaybaha balaagada (linguaggio figurativo) ee loo adeegsado maansada iyo hadalka caadiga ah. Haddaba, waxay ila noqotay in buugaygu koobi karo astaamaha guud ee u gaarka ah maansada soomaaliyeed, oo aan ku qaadaandhigay buuggan afartiisa cutub:

- 1) Qaafiyadda maansada
- 2) Miisaanka maansada
- 3) Murtida iyo balaagada maansada
- 4) Jaadadka maansada

Gaar ahaan, cutubka dambe, anigoo jaad waliba ee maansada ka mid ah raacsinaya waxyaabaha u gaarka ah (xagga mawduuca iyo munaasabada loo adeegsado) ayaa waxaan isku dayay in xeerka miisaanka maansada, oo haatan la soo saaray oona ah lafdhabarka maansada, aan u adeegsado dhammaan noocyada maansada ee aan horay u soo uruuriyay iyo kuwo kaleba. Mid walibana, si hogatus ah, ayaa waxaan u raacsiyay dhowr maanso oo kala duwan ah oo aan ka soo xigtay buugaag iyo cajalaooyin, kuwaasoo magacyadooda ku xusan qaybta raadraaca.

II

MAHADNAQ:

Waxaa mahadnaq weyn iga mudan dadka gacanta iga siiyay qoraalka buuggan oo ka mid ah Ciise Maxamed Siyaad, Yuusuf Xuseen Aadan iyo labada aqoonyahan ee soo saaray xeerka miisaanka maansada soomaaliyeed oo aan aad uga faa'iidays-tay, una adeegsaday xataa jaadad maanso oo aan weli lagu tijaabinin xeer-kaas. Arrintaasina waxay ii xaqiijisay in xeerka miisaankaasi uu sax yahay, oo lagu tijaabibin karo nooc kastaba ee ka mid ah badda maansada soomaaliyeed.

Xamar 1977

Qore

Cabdalla Cumar Mansuur

Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed

III

TUSMADA BUUGGA

GOGOLDHIG.....	I
TUSMADA BUUGGA.....	III
ARAR GUUD.....	1

CUTUBKA KOOwAAD

<u>HIGGAADDA</u> (qaafiyadda).....	6
------------------------------------	---

CUTUBKA LABAAD

<u>MIISAANKA MAANSADA</u>	10
Qawaaniinta miisaanka.....	11

CUTUBKA SADDEXAAD

<u>MURTI</u>	17
<u>BALAAQADA</u> (10 hab).....	24

CUTUBKA AFARAAD

<u>JAADADKA MAANSADA SOOMAALIYEED</u>	30
GABAY.....	32
Qiiimaha gabaygu ku lahaa bulshadii hore.....	32
Miisaanka baydka gabayga.....	36
GEERAAR.....	46
Miisaanka baydka.....	47
BURAAANBUR.....	66
Miisaanka baydka.....	68
JIIFTO.....	78
Dhiska baydaka jiiiftada.....	79
GUUROW.....	85
Dhiska baydka guurow.....	85
MASAFO.....	92

IV

WIGLO.....	95
Miisaanka wiglada.....	97

MAANSO LA HEESO.....	99
Hees xoolaad (hees geel).....	100
Hees mooye.....	111
Hees caanood.....	120
Hees kebdeed.....	125
Hees caruureed.....	131
Hees ciyaareed.....	137
Ciyaar diimeed.....	138
Ciaaraha caanka ah.....	139
Hees durbaan.....	140
Ciyaar haanood.....	141
Batar.....	142
Saar.....	143
Qaboobey (Bay).....	143
Shirib (Banaadir).....	144
Ciyaar lagu ciyaaro Ceergaabo.....	145
RAADRAAC.....	146

A R A R G U U D

M A A N S O

Waxaynu ognahay inuu afku ka samaysanyahay codad sugan oo dadku ku dhawaaqo si ay ugu suura gasho is afgarasho iyo wada nololi. Maansaduna iyadoo jaad afka ka mida ah, ayaa haddana si sugan, kooban, dhadhan, xiiso iyo quruxbana leh ra'yi loogu cab-biraa.

Astaamaha Maansada Soomaaliyeed

Fikrad kastoon maskaxda ku hayno waxaynu ku sheegi karnaa Hadal ama tixmaansa ah. Hadalku waa af maskaxeed (linguaggio della mente) maansaduse waa af-qalbi(shucureed) waa afka heesaha iyo ciyaaraha. Hadalku si uu u noqdo wax qayaxan oo sugan waa i-muu u hogaansamaa qawaaniinta naxwaha, maansaduse naxwaha ka so-kow waa inay ilaalisaa sharciga higgaadda iyo miisaanka. Waa i-nay xambaarsanaata murti adeegsataana xubnaha balaqaada.⁽¹⁾

(1) Kuma waafaqsanin dadka qaba in balaqaada loo bixiyo hadal mal-dahan, waayo xubnaha balaqaada waxaa ka mid ah kuwa aan mal-dahneyn sida ekeeyaha(similitudine). Tusaale: Caasha timaheedu waxay u madow yihiin sida dhuxusha. Bal ka eeg weedha aynu ku soo sheegnay kana raadi murti mal-dahan.

Higgaaddu waa astaanta maansada ugu sahlan uguna horaysa oo jabnaanteeda dhegteemu dareemi karto. Higgaaddu waxay macaysaa, qurxisaana dhiska beydka maansada, sidaas ay tahay waxaa maanta la ogaaday in higgaaddu aanay ka mid ahayn miisaanka maansada, haddii la doonana laga maarmi karo. Higgaaddu waxay ka mid tahay waxyaabaha ugu waaweyn oo curinta maansada ka hortaagan reer magaalka, inkastoo miisaanku ka shidda badanyahay.

Gabayaagu waa inuu yaqaan eraya soomaali ah oo aad iyo aad u farrada badan micnahooduna isku mid yahay, waana inuu si fudud u heli karaa una isticmaali karaa, si uusan u gelin deel qaaf, ama aanay higgaaddu ugu jirabin qaadasho eraya ka leexiya u jeedadiisi hore, hoosaasiyana soo bandhigidda wixii niyi kiciyay oo naftiisu dareentay.

Tani waa tan maanta sababtay inay ku adkaato ninka ku barbaaray magaalada curinta maansadu, waayo wuxuu yaqaan eraya kooban oo la xiriira nolosha madaniga ah, waxaana ka maqan eraya badan oo isu dhigma salkana ku haya dhaqanka iyo nolodha dhabta ah ee Soomaaliyeed. Badiba gofka magaalada ku barbaaray waa ruux dhaqan guuray oo wax u arka sida reer galbeedka ama reer bariga, addegsadana eraya qalaad oon marna ku imaan karin dhadhanna u yeeli karin maansada soomaaliyeed.

Miisaanku waa xubinta ugu muhiimsan oo aanay maansadu dhismi karin haddii uu jabanyahay ama maqanyahay, wuxuuna addegsadaa sad-

dexdaan godob oo soo socota:

1. Alamada (Sillabe), 2. Shaqal dheerayaasha, 3. Rugta Shaqal dheerayaasha.

Beydku maansadu wuxuu ku dhisan yahay tira go'an oo alamo ah. Aan ka soo qaadano buraanburka oo beydkiiisu yahay 18 alanle. Had-dii wadarta alanta beydku ka yaraato inta la soo sheegay waxaa dheelitira wadar shaqal dheerayaal ah oo la eg tirada alanta ma-qan. Taasi waxay ina tusinaysaa inay shaqal dheerayaasha yihiin kaaliyeyaal ama dhamaystirayaal. U fiirso tusaalaha soo socda:

Doo -	xa -	di -	yo	hawd-	ka	i-	yo	mee-	sha	da-	ran-	ta	ba-	dan	15+3=18
1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12	13	14	15	
Daa-	qi	ka-	ri	waa-	yey	gee-		lii	da-	ree-	ri	ji-	ray		13+5=18
1	2	3	4	5	6	7		8	9	10	11	12	13		
Na-	bad-	du	waa	doo-	re	soo-		maa	-li-	yeey	is-	daa			12+6=18
1	2	3	4	5	6	7		8	9	10	11	12			

In yar oo maansada ka mid ah ayaan u baahanayn inay tirada alamadooda ku buuxsadaan shaqal dheerayaal, waayo tiradaa alanta beydkooda ayaa go'an oon marna is dhimin, sida geeraarka oo beyd-kiisu uusan abadkii ka badan kana yaraan 6,7 ama 8 alan..

Tusaale:

(7)alan] Rag sa-baan ka sa-baan baan
1 2 3 4 5 6 7

(6 alan) Sa-maan-tuun ba-di* yaa
1 2 3 4 5 6

(7 alan) Had-duu saa-ki-mi waa-yà.
1 2 3 4 5 6 7

(6 alan) Sal-li-gaan u dhi-gaa
1 2 3 4 5 6

(6 alan) Is-ka see-xo i-dhaa
1 2 3 4 5 6

Kaalinta shaqal dheerayashu ma aha inay dhamaystiraan tirada alamada keliya ee waxay kaloo kaalin wayn ka qaataan luuqda waayo waxay leeyihiin saldhigyo u gaar ah oo badanaaba laga helo. Jaad kastoo maansa ahi si gooniya buu u dhismaa, sidoo kale rugta shaqal dheerayaashu way kala duwantahay wayna kala muhiinsantahay. Qaar meela go'an bay ku leeyihiin shaqal dheerayaasha. Kuwana way is rog rogtaa rugtoodu. Kuwa rugta go'an waxaa u badan heesa; sidaas ay maansada la tiryaa kama reebna tubtaas, sida geeraarka iyo wiglada.

Gabayga iyo buraanburkuba beydka shadarkiisa dambe bay ku leeyihiin rug shaqal dheere go'an (Dib u eeg tixda geeraarka ah).

Waa lagama marmaan in beyd walba laga helo miisaan iyo higaad, waxayna ku shaqa leeyihiin dhiska beydka maansada. In beyd walba murti iyo balaaca laga helaa shardi ma aha. Howshaaduna waa inay micnaha, dhadhanka iyo guruxda maansada hufaan. Si kasta oo ay u dhisantahay maansadu waxba kama duwana hadal maskaxeedka, haddii aanay gudbinayn murti gilgisha shucuurta dhegaystaha iyo akhriyaha.

Maansadu murti ma lahaan karto xiiso iyo dareenna ma abuu-
ri karto haddii aanay xambaarsanayn xubnaha balaagada, maxaa yee-
lay intay murtida maansada koobto bay qurux iyo xiisana u yeeshaa.

Jaadadka Maansada Soomaaliyeed:

Jaadadka Maansadu waxey ku kala duwan yihiin luuqda, miisaan-
ka, mawduuca iyo munaasabada lala eegto; taasoo macaanke iyo mi-
sagelinta maansada dhowr weyn ka cayaartaa haddii ay ka tarjumayso
wadciga xilliga: dagaal, aroos, dabbaal dog, shir, farxad i.w.m.

Inkastoo ay adagtahay in la sheego tirada jaadadka maansada
soomaaliyeed haddana waxa guud ahaan u qaybinay laba nooc: maan-
so la tiriyo(gabay, geeraar, jiifto, guuroow, buraanbur), iyo maan-
so la heeso(hees ciyaareed iyo hees hawleed).

CUTUBKA KOOWAAD

H I G G A A D D A (Qaafiyad)

Waa astaan ay wadaagto maansada Soomaaliyeed oo idili ha
ahaato Geeraar, Gabay, Guuroow, Buraanbur, Hees ama Wiglo.
Astaantaasi haddii ay ka maqantahay maansada waxaa la yiraahdaa:
"Deel-qaaf, baa ku jira maansada."

Higgaad ama qaafiyad waxaa loola jeedaa xaraf had iyo jeer beyd-
ka maansada ka galo xagga hore iyo xagga dambaba, waxaana loo
cuskadaa inuu maansada dhadhan iyo xallad u yeelo. Waana wax
dhaqan u noqday maansada Soomaaliyeed.

Higgaaddu ma aha wax maansada uun loo adeegsado ee waxay soo ga-
shaa wax kastoo xigmad iyo murtiyo ku dheehantahay oo qof ku dha-
waaqo, sida Maahmaahda, Halxiraalaha i.w.m.

Badanaaba beyd kasta oo maansa ahi, wuxuu ka koobanyahay laba
shadar, heesaha mooyee, waana in ugu yaraan shadar walba laga helo
eray ku billowda shibane ama shaqal oo ruuxa maansaaga ahi higgaad
ahaan u doortay.

Habka qaafiyaddu waa mid addunka intiisa badani iskaga tagatay,
hase yeeshee ay horay ugu dhaqmi jireen dadku, sida innaguba ~~ad~~
hadda aynu u isticmaallo. Waxaa caado inoo ah in maansada laga
eego laguha qiimeeyo xagga higgaadda, sidaa awgeed maansaaga wa-
xaa dul saar ku ah inuu dhowro sharcigeeda; haddii uu ka tillaab-

sado qawaaniintaas waxaa lagu tilmaamaa mid aan ku xeel dheerayn maansada waana ku qiime dhacaa.

Beryahaan waxaa soo baxay nin Cabdullahi Dhoodaan la yiraahdo oo qawaaniintaas jebiyay soona saaray maansa la yiraahdo "Jacbur".

Inkastoo aanay ka xigmad yarayn tii hore haddana waxaa ku dheehan qosol, maad, maaweelo iyo majaajillo, waxaana aad u xiiseeya dhegahana u raariciya marka warsidaha laga sii daayo dadka dhalinta yar.

Taasi waxay beeninaysaa inay maansadu ku dhisantahay higgad keliya, waxaana halkaas ka caddaatay inay leedahay wax higgadda ka wayn oo aany ka maarmi karin taasina waa miisaanka, ama dhis-ka beydka oo la'aantii aan beyd quman oo maansa ah ninna curin karin. Sidaas awgeed waxaa caddaatay in si kastoo loo jacoburiyo, haddii ay miisaamantahay, aanay waxba ka xumaanayn. Wuxuuna nooday jacoburkaasi mid wadda u xaara maansadii mudda tirada badan isha keliya oo laga cabo lahayd maanta ay ku soo hirandoonaan dad badan oo afarrey jacobur ah dulleedada kula dhuuman jiray.

Sharciiga hiigaaddu aad buu u aagayahay, oradayna idka aado ma ahee waxaa dhacdi ah :

b) In marafka higgaddu aanmu bedelin ujeedadii maansada la'a lahaa.

t) Sidoo kale marafkaasi waa inuusan yarayin (dhaawicin) miisaan-

ka iyo la'a.

j) Haddii loo eego sharciya qaafiyadda i tiimaalka shaqalku ka fudud kan shibanayaasha, waayo shaqaladu waxay isu banayn karaan goobaaha, meeshii mid yaalna mid kale ayaa imaan kara, bidaas awood waxaa loo xisaabaa hal xaraf tobankoodaba(10) xarafkaas oo ah "Alif".

Taasi waxay muujinaysaa imaan maansada ku socota shaqal dhibaata badan la kala kulmin higgadeeda sida tan shibanaha.

Shibanayaashu isna dhafan dhaafi karaan, oo haddii mid la qaato waa uun in isagaas lagu socdaa, si kastoo maansaagu cirriiri u galo shibane kale kuma lamaanin karo kii ay higgaddu ku socotay.

Erayada qaarkood sida baa, oo, ee, i.w.m. kuma imaan karaan xaraf higgadeed ee waxaa loogu dhaqmaa kaliyaale.

Maadaama ay higgaddu u tahay lagama mar maan maansada, marka ay curiyayaashu dhibaato kala kulmaan helidda xarafka waxay qaataan eray qalaad ama mid bay inta iska sameystaan micne u yeelaan marar badanna ka habaabaan ujeedaddii ay ka lahaayeen maansada, taasi waxay ina tusinaysaa sida ay higgaddu u xirxirayso una jaha wareerinayso maansada. Inkastoo ay sidaa tahay maansaaga wanaagsan higgaddu ma jiidato ujeedadiisana kala weeciso ee si dhib yar buu isaga tiiriyaa.

Qofka aan maansada buuniga ku ahayni wuxuu ku barbariigdaa higgadda, kana habaaba tubtiisa.

Taasi waxay dhaxalsiisaa inuu soo saaro hadala maran oo xignad
iyo murti midna la hayn, waayo ilaalinta biggaadda ayaa la tagta
oo hog iyo banaan ka ridda.

Tusaale: "Shaqallada"

Halkaan shaqallada badankooda waa laga helaa.

Shir aguugay waayeel abyamay tala ahaaddoowdey

Irda jiga albaabo isku xiran eel la bixin waayey

Xaajadaas afraha duubatee loo olmami waayey

Nin aqoon leh aw iyo haddii odaya loo saaro

In kastoo ayaan iyo ayaan lagu aloolaado

Ninkii maalintaa ka arrinshaa aaqil aw ma aha?

(Sayid)

Tusaale: "Shibanaha".

Halkaanna shibanaha " H " keliya ayaa laga helaa.

Sidii geel harraadoo wax badan hawdka miranaayey

Oo haro la soo joojiyoo kuraygu heegaayo

Oo hoobey loo qaaday iyo hadal walwaaheedka

Kolkaad Hodan tiraahdaanba waa soo hinqanayaaye

(Eoodheri)

CUTUBKA LABAAD

Miisaanka Maansada

Maansadeemu kama samaysna higgaaad keli ah ee waxay leedahay miisaan cilmi ku dhisan.

Waxaa la yaab leh sida qofka maansaaga iyo dhegaystuhuba durba u dareemi karaan haddii ay maqlaan beyd ama tix ka jaban miisaanka ama higgaaadda.

Waxaynu ognahay inaanay waxba ka garanayn, fikradna ka qabin waxa miisaanka yahay.

Sababta aanay wax uga sheegi karin way iska caddahay, waayo maansaaga iyo dhegaystahaba lama barin habka miisaanka maansadu ku dhisanyahay ee sidii maalin walba ay u maqlayeen luuqda ayay caadi u noqotay maskaxdoodana ku dhechantay, kolkaas bay gaareen heer dhegtu durbadiiba dareento laaxinka beydka ama tixda ku jira.

Ayaa muhimsan miisaanka iyo higgaaadda ?

Waxaynu qabnaa inuu miisaanku aad uga muhimsanyahay higgaaadda, waayo miisaanku waa waxa ay maansadu ku dhisantahay.

Higgaaaddu codka uun bay macaysaa.

Haddii maanso aanay miisaan ku dhisnayn oo higgaaad keliya raacdo waxaa hubaal ah inaysan maansa fiican~~gi~~ soo baxayni; waxaase dhici karta in tix gabay ahi qumanaato haddii ay ku dhisantahay miisaankii loo doon~~ay~~ay, iyadoon raacin sharcigii higgaaadda, waxaal hubaa inaanay dad badan u cuntamayn tixda noocaasihi waayo waxay ka dha-

dhansanayaan deel qaaf, sidaas ay tahay haddii aad si fiican u dhegeysato tix higgaaad la'aan ah waxaa suuura gasha inay kula qumanaato, ka soo qaad gabay jecburka Cabdullahi Dhoodaan oo beryahaan aad loo xiiseeyo, sharciga higgaaaddana aan dhowrin. Waxaynu caadeysanay inaan dhegaysano maanso higgaaad ku dhisn, sidaa awgeed wixii aan sharcigaas u hoggaansamin wuxuu inala yahay laaxin waayo dhegteennu uma baran.

Haddaan dib u jalleecno taariikhda suugaanta dadyowga adduunka waxaan arki karnaa in maanso oo midili beryihii hore ku wada dhisneyd higgaaad. Markii dambana tartiib tartiib bay u baaba'day tusaale maansada Ingiriiska ayaa ka mid ahayd kuwa higgaaadda ku dhisanan jiray maanta ka madax banaan.

Qawaaniinta Miisaanka

Miisaanka maansadu wuxuu ku dhisan yahay laba shay oo kala ah:

a= alamada (sillabi)

I. Tirada b= Shaqal dheerayaasha

II. Rugta shaqal dheerayaasha oo go'an.

I. Sideebaa loo tirshaa alamada iyo shaqal dheerayaasha ?

Iska tiri uun ma ahee waa in la raacaa sharciyada soo socda,

si loo miisaamo, beydka maansada Soomaaliyeed.

B. Waa in maansada loo qoraa sida curiyuhu ugu dhawaago, haddii

kale miisaan warkiis ma jiro. Maansaagu badanaaba eraya kala goo-
ni ah buu isku dhejiyaa, halkaasoo xurufka qaarkood dhexda ka ba-
xaan, mar marna wuu kala gooyaa, sida markaynu hadlaynaba yeelo.
Run ahaanti maansaagu xor uma aha doorashada is raacsiinta iyo
kala jaridda erayada ee miisaanka aya xakuma.

Tusaale:

- | | |
|------------------------|-------------------------|
| 1. Cagtiyo = cagta iyo | 2. haddaad = haddii aad |
| 3. Anoo = aniga oo | 4. Intuu = inta uu |
| 5. Markaan = marka aan | 6. Baygu = baa igu |
| 7. Laysu = la isu | 8. Waw = waa u |
| 9. Way = waa i | 10. Sidaynu = sida aanu |
| 11. Siday = sida ay | |

Kolkii taladaas la raaco baa la heli karaa tirada alamada oo
quman. Tusaale: Erayga anoo wuxuu ka kooban yahay laba alan oo ah:
a - noo, khalad ayuu miisaanka u keeni karaa haddii laga dhigo
afar (4) alanle ah: a - ni - ga - oo.

T. Xarafka " W iyo Y " mar marka qaarkood waxaa lagu tiriyaa sha-
qal, waxaana u sharad ah sida soo socota:

1. Xarafka " W " kolka alantuu ka mid yahay uusan ugu horayn ee
dhexada ama gadaal uga jiro, xarafkaas "W " iyo shaqal gaabka

ka horreeya waxaa loo tiriyaa shaqal dheere meel kastaba eraygaha uga jiree, sida: Howl, dawlad, dawga, Eebow, sow e.w.m., Marka xarafka "W" uu ka billaabmo alan, meel kasta ha uga jiro eraygee, looma tirin karo shaqal dheere sida: wa - xa, ha - wa - da, war -ka, weer, waa - yeel i.w.m..

2. Xarafka " Y " wuxuu la qaynuun yahay xarafka aan kor ku soo xusnay, hase yeeshee meel buu uga geddisan yahay:

Kolka alantu aanay ku billaabanayn " Y " oo xarafkaas loo xisaa-bayo shaqal waxaa u tusaale ah erayadaan: weynu, ga-bay-ga, ou - lays, cay - mo, la- hayn, fa-ras-kay-ga iyo inta " AY " raacdo sida: bay, waxay, markay, i.w.m.

Marka xarafkaani uu ku billaabmo alan oon looma tirinayn shaqal waxaa u tusaale ah erayadaan: yar, ciir - yaa - mo, ta - ha - ye, guu - yo, a- yaan.

Haddii xarafka " Y " ihi ku dhamaada eray fal ah looma tirinayo shaqal inkastoo uu waafaqsanyahay sharcigii aan ku soo xusnay kor.

Tusaale: ba - xay, sii - yay, ta - hay, dii - day, jii - ray.

Waxaa la is waydiin karaa: Waxaa " W iyo Y " ka dhigay shaqal ?

La tira buuxsibaa loo sharciiyastay mise wax cilmi ku dhisan ?

Haddii aad u sii fiirsatid labadaan xaraf oo ah (W & Y) waxay

kaga duwanyihiin shibanayaasha kale xagga dhawaaqa. Waayo marka

shibanayaasha lagu dhawaaqaayo waxaa la dhaqdhaaqaajiya meela go'an

1.. yahay = yahay

2. dejiyay = dejiyay

3.. cawada = cawada

4. ayaa = ayaa

5. ha - wada = hawada

6. cunay = cunay

II. Waxaa kaloo miisaanka ka mid ah rugta shaqal dheerayaasha.

Runtii maansada qaybteeda heesaha ayaa aad looga dareemaa rugta shaqal dheerayaasha. Maansada qaybta kale oo la tiriyo aad uma cadda rugtoodu, hase yeeshee qaarkood aad bay u qeexantahay, sida geerarka iyo gabayga.

Beydka geeraarka waa in had iyo jeer laga helaa 2 shaqal dheere rugtooduna waa alanta 3 aad iyo tan 5aad. Alanta 4aad iyo 5aad waa ka xaaraan. Inta hartayna way u bannaantahay.

Beydka gabayga shadarkiisa dambe waxaa shardi ah in laga helo laba shaqal dheere kuwaasoo laga heli karo rugta alamada kala ah: 4aad, 5aad, laad iyo 3aad. Mar mar ayaa waxaa dhicikarta in shadarka laga helo 3 shaqal dheere, taasi waxay ku dhacdaa alanta 2aad oo shaqal dheere yeesha. Beydka sidaas ah haddii qummaati loogu luuqeeyo shaqal dheeraha alanta 2aad dhawaaqiisa lama dareemikaro waayo waxaa lagula qabtaa erayga ku xiga alantiisa hore. Sidaa awgeed waxaa lagu tirshaa shaqal gaab. Arrintaasi uma gaar aha gabayga keliya ee waxaa la wadaaga buraanburka oo isaguna leh shaqal dheerayaal la maldaho. Haddaan tusaale ahaan u soo qaadano

oo afka iyo dhuunta ka mid ah. Waxaan ognahay in shibanayaasha
koox waliba leedahay meel dhaq dhaqaaqda sida: Carrabka oo mar
la laabo marna dhanxanaga lagu dhejiyo, gowsaha oo la isku dhejiyo,
cunaha oo la buuro, bishimaha oo la isku qabto ama la kala furo.
Intaa oo dhan midna wax kuma leh " W & Y " ee waxay aad ugu dhaw-
yihiin, ama la mid yihiin xagga dhawaaqa shaqalada kuwaasoo xubin
gaar ah aan ku la hayn kuwa dhawaaqa; waxay u baahanyihiin cod la
soo saaro iyo afka oo la kala furo. Labadaan xaraf waxay waliba
aad ugu sii egyihiin kolka alanta dhexda iyo dhamaadka uga jira.
Inay labadaan xaraf shaqallada la bah yihiin waxaa kaloo inoo cad-
daynaysa marka aynu aragno Reer banaddirka oo meeshooda geliyaan
shaqal dheer weliba waa markii aanay alanta ugu horayn.

Tusaale:

- | | |
|---------------------|--------------------|
| 1. daynta = deenta | 2. hawl = hool |
| 3. wayn = ween | 4. khayr = kheer |
| 5. deyr = deer | 5. howsha = hoosha |
| 7. beydka = beedka | 8. qaybta = qeebta |
| 9. culays = culeen. | |

Haddana waxaanu arkidoonnaa iyadoo aan qofna ka dhigikarin shaqal
dheer, waana marka ay ka billaabanayaan ama eray fal ah ku dhammaa-
nayaan sida:

beyd gabay ah oo rugta shaqal dheerayaashu isweydaasanyihiin ma-
xaa dhacaya ? iyo weliba innagoon eray ka bixin kuna biirin.

Tusaale:

- Haddaad dhimato geeridu mar bay dhaantaaye noloshu (Qalad)
- Haddaad dhimato geeridu marbay noloshu dhaantaaye (S a x)

Rugta shaqal dheerayaashu waa wax aad muhiim ugu ah xagga mii-
saanka maansada haddii aan la sugin ruunkoodana naxli waa lama
huraan. Rug shaqal dheere oon is rog rogin waxaa lagu yaqaan sida
badan heesaha (H. Xoolaad, Mooyeed i.w.m.).

CUTUBKA SADDEXAAD

M U R T I

Marka maanso si habboon loogu qotomiyo miisaanka iyo higaadda, maaha micneheedu inay tanay mid dhan oo la orankaro Al-lay lehe waa maanso ! Haddii aanay gudbinayn murti iyo xigmad, taasoo la doonayo inay ku jihaysnaato kicinaysana shucuurta, garashada, dareenka, mala awaalka iyo qalbiga dhegaystaha iyo akhriyaha. Qiimaha iyo qaayaha maansadu wuxuu ku xiranyahay hadba sida ay dadka dareenkiisa u taaban karto uguna raaxaynkarto.

Marka aynu leenahay raaxo ulama jeedno farxad, qosol iyo maad keliya inay maansadu lahaato ee waxaa kaloo aad u muhim ah inay ku dareensiiso tiiraanyo, murugo ciil, iyo caloolyow, Runti nolosha dhabta ah qofna kama helo wax ka nixiya, ka argagaxiya ama ka oo-hiya, hase ahaate marka aynu daawanayno maadees, filim ama sheeko akhrinayno inkastoo naxdin iyo argagax iyo tiiraanyo ay ina dareensiyaan haddana waa inoo raaxo, oo waanu ka helnaa oo faaninnaa.

Haddaba maansadu waa sidoo kale, waxaase is waydiin leh: Goormaa la curiyaa maanso murtideedu kicinkarto shucuurta dadka. Maansada haduaanay ka keenin maansaagaa wax aad u dhibay oo u u miciin waayey, ama wax uu nacay oo in muddo ah la socday oo uu u taag waayay, amase farxad iyo dhibaato jacayl ka yimid, meel fog kama soo go'in murti waynina kuma dheehna ee waa afka bax culays maleh.

Bal dhugso tixdaan gaaban oo Yuusuf X. Aadan innoogu sharxayo ar-
rintaas:

" <u>Haddaan</u> <u>gabayga</u> <u>uurkoo</u> <u>bukiyo</u>	<u>urigi</u> <u>kaa</u> <u>keenin</u>
<u>Asaan</u> <u>Olo</u> <u>l</u> <u>jacayl</u> <u>iyo</u> <u>xanuun</u>	<u>kugu</u> <u>ijbaareynin</u>
<u>Afkuun</u> <u>baad</u> <u>ka</u> <u>leede</u> <u>tixuhu</u>	<u>arar</u> <u>ma</u> <u>yeeshaaane</u> ".
1 2 3 4 5 6 7 8 9	1 2 3 4 5 6

- - - o O o - - -

In ay dhab tahay in maansaagu curiyo maansa qaaya leh, marka
dareenkiisa iyo shucuurtiisa ay helaan caris (stimolo) kiciya,
waxaa inoo caddeynayaa gabayada caanka ah ee ay tirsheen gabaya-
hanada laga dambeeyey. Aan ka soo qaadno, tusaale ahaan, Sayidka
iyo Raage. Gabaydii Sayidka waxaa ugu qiira iyo qaayo badan ihta
calaacalka, tiiraayada iyo raffaadka ka hadleysa sida: "Gudban,
Jiinley, Dardaaran iyo Waa Adduun".

Sidaas oo kale gabayadii Raage Ugaas boqorkii maansadii calaa-
calka iyo tiiraanyada aad bay inoo taabtaan, waxaana ku badan ca-
laacal run ah oo iska yeel yeel aan ahayn. Bal xusuuso gabayadii-
sii " Sida Koorta Yucub iyo Allayl dumay", waannu wada ognahay
waxa ku khasbay inuu curiyo gabayadaas ay yihiin ciil iyo tiiraan-
yo, kaddib markii ay naagi ka dhimatay naguna laga boobay.

Haatan waxaan halkaan ku xusaynaa gabay calaacal ah oo uu Raage
tiriyaay iyo sababta uu u tiriyaay.

Geeridii Ugaas Xuseen.

Raage waa ina Ugaas Warfaa Samatar Fooljeex. Kolkii uu aab-bihiis geeriyooday waxaa la caleemo saaray walaalkiis Xuseen oo marka dambe Ugaas Xuseen la bixi doona, Xuseen wuxuu noqday nin loo bogay oo aad iyo aad hawshii uu beesha dhexdeeda ka hayey uga soo dhalaalay. Guddoon wanaagsan iyo nabad jacayl aynuu ku tilmaannaa, nin eexo yaqaanna muu ahayn. Ninka jaadkaas ah dadka oo idil baa wada jeclaada, si weynna waa loo tixgeliyaa, waana laga dambeeyaa.

Raage intii uu Ugaas Xuseen maamulka beesha ku jiray wuxuu isagu had iyo goor u taagnaa dagaal, dhallinyarayn, naagdoon iyo cayaar-gud, wuxuuna haa nin hortaa bannaan ku socda. Ciddooda iyo beesha kale midkoodna welwel kama hayn, maxaa yeelay wuxuu rumaysnaa inay joogidda Ugaas Xuseen ay hawl oo dhan ka xil tirayso.

Maalin maalmaha ka mid ah, isagoo Raage degmo uu xidid la ahaa marti u ah oo geel horweyn ah xeradiis la hor tuban yahay ayaa nin socdaal ahi soo muuqday.

Haddii lays nabdaadiyey wuxuu ninkii ku warramay war laga naxo oo ah in Ugaas Xuseen dhintay.

Raage wuxuu noqday goroyo gabbal u dhacay. Wuu soo luuday oo gurigiisii yimid, isagoo murugeysan oon ~~hog-dah~~ dhex la gabto

lahayn, jirkiisa meeshii laga saraa aan dhiig ka imaadeen. Aqalkii buu inta galay madaxa iyo manjaha duubay.

Afadii u dhaxdey ayaa inta cunto soo diyaarisay istiri toosi, mise nin joogaba ma aha. Hadday hadal iyo wax weydiin ka deyn weydey ayuu madaxa kor u qaaday, isagoo suxulku dhulka ugu mudan yahay, markaas buu si taahid u eg ku yiri:

- | | |
|----------------------------------|----------------------|
| - Sonkor iyo sarreen malabiyo | sixin ku iidaaman |
| - Sabcasayntii Adari iyo | timirtii reer Baaxil |
| - Hay siinnin soortii shifaan | lagu sadaadoone |
| - Suno igama gelin dhuunigaad | soo day leedahaye |
| - Sengihii xiniinyaha la jaray | waa sidaan ahaye |
| - Sii kac iga tag oo igala durug | soo noqnoqodkaaga |
| - Igana seexo meel la i saraan | seedi kaa go'ine |
| - Ama saadannimadii haween | saacadba i toosi! |

Intaas kolkii uu yiri ayay aabaheed u tagtay oo ku tiri:

"Aabbow Raaye neel looga yimidba, amar baa caawa ku yuururan".

Muuu odaygii yiri: " Gabay uu ku tirin doonaaye bal adigu god-godka iyo wax weydiinta ha ka deyn ". Afadii aqalkeedii kuma ay laabane waxay u tartay dhallinyaradii geelleyda ahayd oo uga war-rantay Raaye iyo muruqda ku muqatay. Ragii oo idil baa aqalkii ku ku jibay ka soo dhaqmaay, xarxar inta baa baa yiri:

- Sanfigiisa gabay waanigii waayo saammaraye
- Waa kaan sedkaygii horiyo saanigii belaye
- Waa kaan saxiimad ugu raray salawgi Baylaade
- Waa kaan sabciin iyo casharo suuto asyaraye
- Binjibaar halkii tegi lahaa seemad iyo hooli
- Oon xalayto igu soo sur oran goor saqdii dhaxe ah
- Noogsoon sur dhagaxeed nonoogiyo soo cashiyo diiddo
- Qhow lay salaaxe intay suqyar baarayso
- Salacaddaan fadhiyey Jaamacow la iga saarye
- Salkaba inaanan dhigin baa adduun laygu saakumayo
- Sidii sugiye neef qali baan suuqa taagnahaye
- Haddaan geed syaab looga dhigin saar ma joogsado e
- Soofuhu birta hadduu ka jabo saawir bay noqone
- Suheer ma arko labada indhood nimay sarsarmeene
- Gobannimo raggii sare ka lumay waa siraad ama e
- Haddaanay fariyo soo-raac lahayn waa sakaar ariye
- Wax badan baan salaamiyo ahayn saafi nabadeede
- Dhaaxaa sida siiqda webi saa naloo wadaye
- Amba saatan uun baydin noqon saabka kuma hayne
- Shir sasabane oo saaddambaa amase saakuuna
- Surulkaa ka soo leef hadduu bedowgu sooyaame
- Raggii kala sabaalayn jiriyo sayncaddaa maraye

- | | |
|---------------------------------|---------------------|
| - Banyaraan asaydiisa siday | toban sabaanoode |
| - Soo-toosiyaa Aadan cunay | sikhilkii gaabnaaye |
| - Sooraame aar baa hafsaday | sararihii Nuure |
| - Sebaankii dhoweyd Yuusuf baan | siigadii dhigaye |
| - Sahal bay ahayd kuwaan | saa u leeyahaye |
| - Maantaa sallaankii u jabay | Samatar-Fooljeexe |
| - Caku haddaan samo adduun | kor u siyaadeynin |
| - Sarsar igu bannaanaa mus iyo | sud igu awdnaaye |
| - Soo jeedahaan ku hurdi jirey | sulubkii geeryooye |
| - Sideen yeeli Eebow qalbigu | iga silloonaaye ! |

Tixdaas halkaas ayuu ku dhammeyey, shakina kuma jiro inay hadal waaweyn oo ilma ahi indhihiisa ka soo daateen.

Geerida Ugaasku waxay Raage gelisay naxdin aan xad lahayn, dhiillo iyo dhibaato uu la seexan kari waayey. Yuusuf, Sanyare, Nuur iyo Horanba waxay ahaayeen niman geeriyi u timid oo ay gabayaaga walaalo ahaayeen ama ilmo adeer ahaayee, hase ahaatee geerida raaggaas haddii la garab dhigo tan Ugaas Xuseen, ~~hase ahaa~~ way sahlamayd, Raagena way la fududayd, inkastoo iyagana si xun ugu murugoodey.

Waysaga oranaya kolka uu raggaas soo tiriyo:

- | | |
|------------------------------|----------------------|
| - Sahal bay ahayd kuwaan | saa u leeyahaye |
| - Maantaa sallaankii u jabay | Samatar - Foojeexe ! |

Geeridaasi waxay Raage xasuusisay sidii waaynayd ee uu Ugaas-
ku goleyaasha laysugu yimaado uga doodi jirey ama garta uga naqi
jirey oo danaha beesha u daryeeli jirey. Waxaad mooddaa inuu afa-
diisa iyo ragga kale ee u yimidba ku leeyahay: War, go'ooyin, ma
cuntaa ii dhadhamaysa oo ma dhuuni baa iga degi karaya aniga oo
ay maanta igu soo fool leedahay hawshii uu Ugaas Xuseen iga hayey,
laygana doonayo inaan kaalintiisii galo. Alla, hadalka iyo war
weydiinta igala taga ! ...

- Soo jeedahaan ku hurdi jiray sulubki geeryooye
- Sideen yeeli Eebow qalbigu iga silloonaaye !

Labadaas meeris oo uu gabaygiisu ku soo idleeyey waxay mala-
hayga yihiin labo meeris oo aad iyo aad tiiraanyo u leh, una qal-
ma in lagu idleeyo gabay jaadkaas ah.

B A L A A Q A

Si murtida maansadu xambaarsantahay u yeelato micna kooban quruxi iyo xiisaba, maansaagu wuxuu si habsan u adeegsadaa xubnaha balaqaada.

Inkasta oo xubnaha balaqaada lagu adeegsado xataa afka caadiga anba, haddana marka maansada lagu isticmaalo raadka ay maskaxda ku reebaysaa ka qoto dheer kan caadiga ah.

Shardi ma aha in beyd walibo laga helo xibnahaas, sida miisaanka iyo higgsaadaa, saas ay tanay haddii maansada beydadkeedu ka maqan yihiin xubnaha balaqaada hodannimada maansadaas way wiiqantaa.

Xubnaha balaqaadu aad bay u fara badan yihiin, dhowr ka mid ah ayaan halkaan ku taxaynaa.

1. Ekeeye (similitudine).

Waxaa la adeegsadaa marka laba wax oo kala duwan isku ekaantooda la isu qiyaasayo. Marka lays bar bar dhigo labada shay oo meel isaga eg(ekeeye iyo loo eke), waxaa shardi ah in laga dhax helo erayadaan midkood: sida, oo kale, la moodaa i.w.m.

Tusaale:

Xaliima	way dheertahay	sida	Cali dheere
eke	waxa laysaga	erayga	loo ekeeye
	egyahay	ekeynta	
1	2	3	4

- Lagu mood dhirtii Maacaleesh midabadeediye
- Sidii ari tigaad cunay miyaan taaha ku caweeyey

(Nuur J. Magan)

2. Ereg (Metafora)

Waa xubin ah isgarab dhig ka dhexeeya waxyaalo sal haan ka-
la duwan. Waxaana shardi ah in aan laga dhex helin ekeeyaha iyo
loo ekeeyaha erayga ekeynta oon horay u soo eragnay (sida, oo kale,
la moodaa) iyo waxa laysaga egyahay oo dahsoon, marna loo ekeeyaha
falkiisa ama astaantiisa keliya ayaa laga soo ergadaa.

Tusaale:

- Daraawiish waa jibin dhawgaiyo jowga soo bixi dheh (Sayid)
- Dhubadow nin maansada beryahaan maalayaan ahaye
- Kubka miyaan ka jabay biixidaan kabaya loo haynin (Raage)
- Ninka ila biya soo arkoo ooman baan ahaye (Raage)

3. Qofeyn (personificazione).

Marka shucuur ama astaamo aadamiga u gaar ah lagu sheego ama
la siiyo xayawaan ama waxaan nooleen.

Tusaale:

- Finyahow adaa ololaye oohin ciirsaday e (Cali Xuseen)

- Guuguulihiiyow haddaad guga u ooreyso

4. Buunbuunid (hyperbole).

Waa hawraar wax run ah sheegeysa iyadoo sida ay wax ga sheegeyso ad loo naax naaxiyo.

- Wadnihii miyaa kaw i yidhi kalimadii yeedhay (Raage)

5. Astaan (simbolismo).

Waa wax micnihiisu dhaafsan yahay waxa uu isagu yahay. Waa shay laysla og yahay oo wax kale ka jooga.

Haddaan dhahno: Cali wadna ma laha.

Erayga wadne wuxuu ka joogaa geesinimo.

- Gumeysigu hashuu naga dhacay een gurayey raadkeed (Qaasin)
- hasha (maandeeq) = qarankay ka joogtaa.

6. Sarbeeb (allegoria).

Sarbeeb waa sheeko ama sifayn leh micna labaad oo ka dambeeya macnaheeda cad.

Tusaale:

- Gamaankiina badan Feetanow gabalba waa cayne

- Qaar baan ka goor iyo ka goor godolka dayneyne
- Qaar baan garmaamaha la barin gaabina u dhalane
- Gabax lagu shakaaliyo seengihii gaabi orodkiye
- Gacalnimo haddaad naga rabtaan go'aha noo doorsha.

(Sayid)

- Hadal gar ah ayey baahidow gobi la yaeshaaye
- Nin gammaan yaqaan maqashe wuu gaasabixiyaaye
- Waa laba gu'iyo dayr diraan fuulinkeed goline
- Waa taas gankeedi suryaha loogu caws guriye
- Maxaad nagu geleysaa haddaad fuuli garan weydey?

(Feetin)

7. Maakubid (apostrofe).

Waa war lagula hadlayo noole ama ma noole, laga filayo in uu ka war celinkaro orahda loo soo jeedinayo, wuxuuna noqon karaa joo-ge ama maqane.

Tusaale:

- Calanyahow walhanaya adaan kuu warramayaaye (Tima Cadde)

8. X u s (allusione).

Xus waa tixraac, waaqdhac taariikh ah ama murti hore loo yiri.
Waxaa ay la kaalin tahay macna raac ama astaan la cusleeyey.

Tusaale:

- Qaabiilba Haabiil markuu qoonsaduu dilaye

9. Sangar-raac (onomatopeica).

Waa eray jilaayo dhawaaqa ama codka shayga laga hadlaaya.
Erayadaan aad bay ugu fiican yihiin maansada, waxay aad kuu da-
reensihaayaan falka laga hadlayo.

Tusaale:

- Siday kuugu jeexeen magliga jararacdii sheego (Sayid)
- Ma wareege libaaxoo,
intuu neef ka web siiyey. (Raage)

10. Weersan (Eufemismo).

Waa marka la doonayo in shaaca laga qaado war tiiraanya leh,
marka si aan looga nixin qofka waxa loo sheegaaya, ayaa loo aadeg-
sada eraya maldahan oo raxmad leh warkiina gudbinaaya.

Tusaale:

- Ma sabaan ka sabaan baan raggaaygii la sadqeeyey
- Soofkeygii la xaraashay sed yaa ii ga ceshaa
- subax walba lahaa (Sayid)

- Sidii inan yar oo hooyadeed aakhiro u hoyatey

- ° la sadqeeyey = la laayey, oo haadka loo waray
- ° aakhiro u hoyatey = dhimatay.

CUTUBKA AFARAAD

JAADADKA MAANSADA SOOMAALIYEED

Siyaaba badan baa loo kala saaraa maansada Soomaaliyeed mid walibana waxay leedahay magac gaar ah.

Waxayaabaha saldhiggu ah kala miiriddooda waxaa ka mid ah: Luuqda lagu qaado (Habka ritmiga eraygu u dhacayo), beydka, mawduuc-yada i.w.m.

Maansada Soomaaliyeed waxay u kala baxdaa in ka badan 40 jead, halkaan waxaan ku haynaa kuna falanqaynaynaa inta ugu caansan ugu-na curadsan.

Guud ahaan maansadu waxay u kala baxdaa laba nooc. Mid la tiriyo iyo mid lagu heeso.


1. Maansada la tiriya waa mid murti iyo macna wayn leh mana raacaan sacab, jaan iyo durbaan midna, buraanburka oo marna la tiriyo marna la ciyaaro mooyee.

Maansada la heeso nafteedu macna iyo murti kama maana, waxayna u kala baxaan hees hawleed iyo hees cayaareed.

Hees hawleedka waxaa lagu qabtaa shaqo ha noqoto mid xoolaad ama mid farsamo.

Hees cayaareedku waa midka qaata sacab, jaan iyo durbaan, waxaa laala fiirsadaa xilliyada faraxa iyadoo loola jeedo maaweelo madadaalo iyo farax gelin.

Labadaas qaybood oo aamu soo sheegnay haddii la falanqeeyo midwaliba waxay noqonaysaa bad, siiba hees cayaareedka, waayo wadankeena waxaa laga dheelaa in ka badan 100 cayaarood midwalibana hees u gaar ah bay leedahay.



G A B A Y

Maanso oo idil waxaa ugu horeeya calankana u sida uguna hana-
qaadsani waa gabayga; waxaa la moodaa imuu ugu qiima iyo qaaye weyn-
yahay. Taa waxaa u daliil ah, in dadka qaarkood gabay ku magacaa-
baan in allaale intii lagu maansoodo (Gabay, masaf, jiifto, guuro).
Sidaa awgeed qofka maansooda waxaa loo yaqaan gabyaa. Dadka gabay-
ga tiriyaa waa kala oraah wanaagsanyahay, hilinka iyo hogta gabayga-
na kala heli ogyahay, danta iyo ujeeddooyinkana kala abbaari ogyahay.
Waxaa iska caadi ah in gabayaagu toobiyaha maansada abbaaridiisa ku
kala fiicanyahay, nin walibana hal ama wadar ka mid ah ku caan baxa
qaarna ku liita.

Kawduucyada gabayadu badiba ka hadlaan waa kuwa soo socda: Ammaan,
guubaabo, digasho, calaacal, cay, yuasho, duca, faan, naftiihafar,
hanjabaad, dood, fartiin, ergo, afeef, abaaldhac, talo, halxiraal,
sarbeed, baryo, hawaal warran iyo taariikh.

Hadda waxaynu isku deyaynaa inaanu baaro una dhaba gallo neesha
gabaygu la joogay bulsha wayntii Soomaaliyeed iyo hanka iyo xush-
nada looga gabay xeyiga Soomaaliyeed ninka gabayaaga.

QIIMADA GABAYGU KU LAHAA BULSHADEENII HORE

Gabaygu taariikhnii hore qiime weyn ayuu la ishaa, sidaas ka-
raadoodna ninka hadda ku jira bulshada waxaa la soo dhaweynayaa.

tixgelin jirey, markiisana loo riyaadi jirey. Keesha uu ninka gab-
yaa dagan yahay meeyaane geyiga Boomaaliyeed oo idil ayaa magacii-
sa laga hayn jirey, haa walbana maahee waa haddii gabay wanaagsan
iyo murti meelmar ah lagu barto. Maamuus aan lala wadaagin ayuu
lahaa, jooridiisana si weyn ayaa loo jeclaa, maqnaashadiisana waa
la a xumaan jirey haddii aan laga nixinba.

Dadkeenni hore kolka ay weerar iyo gabbagebo u
colka badanaa ay niyaadi sami kuma duuli jirin haddii aan gabayaa la
socon. Gabayadiisa iyo geeraarradiisa guubaabada ah ayaa dhallinyar-
rada duullaanka ah geesinnimo siyaado ah ku beeri jirey. Colkaasi
inta uu waddada sii hayo wuxuu laabta ku hayn jirey guul iyo lib
inuu la soo laaban doono? Ka dhig in colkaasi guuleysto oo uu geel
taabo. Maxaa uu ninka gabayaa abaalgu u lahaa? Saamiga uu colka kale
ula siman yahay ka sokow, gabayaaga colku wuxuu lahaan jirey hal chee-
raad ah oo loo ogyahay, muranna uusan marnaba ka dhici karih; "hal-
gabay" baa la oran jirey ama "hal-geeraarshe!"

Kolka uu jiilaalku cheeraado oo uu cirku gofo' diido gabayaaga
ayaa reer miyigeennii uu imaan jireen ee ay weydiisan jireen inuu
Eebbe gabay ku baryo, iyagoo laabta ku haya ama rumaysan in ducadii-
sa samada laga aqbali doono. Sidaas oo kale ayaa ninka gabayaaga ah
aan xoolihiisa iyo dadkiisa midnana lagu dhiirran jirin, waxaana
la aaminsanaa in sida ducadiisaba loo aqbalo habaarkiisa iyo yu'-
ashadiisana loo aqbalayo oo uu af-kuleeblo yahay. Wadaadka iyo gab-
yaaguba dhowriteen gaar ah iyo maamuusid ayay mujaahada ku cheer joo-
di jiraan.

Gabayaagu wuxuu ahaa warfaafiyaha degmadiisa, wixii xaajo ah ama dood ah oo degmo kale uga xirmaana isaga ayaa ka hadli jirey, loogana dambayn jirey.

Waxa dhici jirtey in degmo degmooyinka ka mid ah gabay cay ama aflagaaddo kale ah loo soo mariyo, Kolkaas ayaa degmadii gabayga loo soo mariyey nin ka mid ah oo gabyaa gabay habboon ka celin jirey, isagoo aad mooddo inuu reera hooda u joogo jagada Wasaaradda Warfaafinta dawladaha casrigan maanta ahi ~~sanyste~~ samaysteen.

Kolka ay barwaaqada tahay oo baashaalka loo joogo, nabadina jirto ninka gabya ayaa loo imaan jirey oo laga codsan jirey inuu mariyo gabayo lagu maaweelo, iyadoo macaanka murtida lagu raaxaysanayo, markaas baa tixdii uu curiyo dhallinyaro iyo waayeelba la qaadada dhigi jirey.

Haddii nin gabayaa ah oo la yaqaan saboolnimo la soo deristo wuxuu beegsan jirey boqor ka mid ah boqorradii Soomaaliyeed oo gobollada dalka u kala talin jirey ka hor intaan gumeystayaashu maamulka waddankeenna gacanta ku wada dhigin.

Ninkaasi danta uu leyyahay gabay ama geeraar midkood ayuu ku sheegan jirey, boqorkuna sinaba uguma dhici karin inuu hoojiyo oo qadiyo. Wuxuu, dabadeed, soo laaban jirey isagoo la soo xoolleeyey oo afku cad yahay.

Haddii labo qolo dareen kala galo, col laysu qalqaalsado, war-maha laysu soofeysto oo wax kala hor joogsada la waayo nin gabyaa ah

ayaa loo wici jirey, Wuxuu kala dhex joogsan jirey labada col dhexdooda oo gabay maslaxdoon ah ka marin jirey; halkaas baa inta lagu kala dareero garran iyo geedka shir loo ballami jirey. Immisa dagaal oo dad iyo duunyaba huf lagu noqon lahaa ayaa gabayaa baajiyey. Immisee se huriyey oo hoog, halaag iyo himbiriisi laga qaaday!

Siyaalahaas aan soo sheegnay iyo siyaalo ka daran oo aan la sheegdheegi karin ayaa gabayaaga loo maamusi jirey, mujtamaca uu ku dhex nool yahayna indho gaar ah ayuu ku eegi jirey, wuxuuna u ahaa xiddig ay ifsadaan.

Dadkeennii hore ma ay haysan qalabka warka lagu tebiyo, saasoo ay ahaydna gabaygu ma qarsoomi jirin. Haddii tusaale ahaan Jigjiga gabay laga tiriyo, toddobaad ama laba ka dib Hobyo, Ayl, Boosaaso iyo Taleex ayaa lagaga haasaawi jirey? Niman fardo dheereeya ku jooga ayaa loo dhiibi jirey oo hadba meeshii loola jeedo geyn jirey. Si wanaagsan ayaa nimanka gabayga sida loo soo dhoweyn jirey, lamana sii deyn jirin ilaa la qaybo murtida ay intaas ee dhul ah u soo mareen.

Waxyaalahaas oo idili waxay inoo muujinayaan qiimihii weynaa ee gabaygu Soomaalidii hore la lahaa iyo meesha sare ee gabayaagu dadka uu la degmada yahay iyo guud ahaan nolosha reer miyigaba kaga jirey.

MIISAANKA BEYDKA GABAYGA

Haddaan doonayno in aanu siinno qaymuun guud oon la dhaafi ka-
rin, beydka gabayga waa in uu ku dhisnaadaa 20 ama 21, oo ah wadar-
ta isugeynta almada iyo shaqal dheerayaasha beydka. Wixii intaa ti-
ro ka yar ama ka badan lehna ma noqon karaan beyd gabay oo quman.

T u s a a l e :

1. waa i-din da-gaa-yaa kuf-ri-ga aad u deb-cay-saa-ne (15+5=20) (Sayid).
2. Nin-kii a-ni-ga i-ga maar-mi-ka-ra u-ma mu-raad yee-she (17+4=21)
(Saahid Q.)
3. Waa-ni-hii mi-yaa kaw i-yi-dhi ka-ii-ma-iii yee-dhe (15+5=20) (R. Ugaas)
4. Had-daad- dhi-ma-to gee-ri-du mar-bay no-lo-shu dhaan-taa-ye (16+5=21)
(S. Carrabey).
5. Wa-lee i-na ra-gow ta-lo ad-duun taa-da uun ma a-ha (16+5=21) (Q. Bulxan)

Haddiise aan sii baar baarno dhiska beydka gabayga, sharciya
badan baa inoo muuqanaya: Beydka labadiisa shadar bal aanu kala qaadno.
Shadarka dambe wuxuu leeyahay qaymuun cad oo aan gadgadoodin. Waa inuu
shadarku ku dhisnaadaa 6 alan iyo labo shaqal dheer, wadartooduna waa 8.
Waxa keliya ~~he~~ is rog rogi karaa rugta shaqal dheerayaasha oo badiha
noqon kara alanka 4aad, 5aad, laad iyo 3aad una kala bormarinay sida
ay ugu kala curadsanyihiin.

Tusaale:

1. Anaa diiday maantuu lahaa $\begin{matrix} \text{dee-qan i-ga hoo-ye} \\ 1 \quad 2 \quad 3 \quad 4 \quad 5 \quad 6 \end{matrix}$ (Sayid)
2. Lagu mood dhirtii maaaleesh $\begin{matrix} \text{mi-da-ba-dee-dii-ye} \\ 1 \quad 2 \quad 3 \quad 4 \quad 5 \quad 6 \end{matrix}$ (C. Cahayr)

3. Halkaan jilibka ugu aasi jiray ^ospw ^ola ^ote-bimaa-^oyo (C.Sharmaarke)
1 2 3 4 5 6
4. Hoogaansigeedii dambaan ^osoo ^oha-baa-bi-ra-ye (Boodheri)
1 2 3 4 5 6
5. Haddii geed la jare waa fufaa ^oguun ^ohad-duu ya-ha-ye
1 2 3 4 5 6

Shadarka hore sharcigiisu wuu ka duwanyahay kan dambe oo aynu ka soo hadalnay. Wadarta alamada iyo shaqal dheerayaashu waa inayan ka badan kana yaraan 12 ilaa 13. Hase yeeshee tirada alamada iyo kuwa shaqal dheerayaashu ma la ha sharci go'an sida kan shadarka dambe, ee wuxuu u habaysmi karaa shan (5) siyood oo kala duwan. Afar shantaan ka mid ahina min laba waji bay jeelan karaan.

I. Nooca hore wuxuu ka kooban yahay 7 alan iyo 5 shaqal dheer (7+5=12).

Tusaale:

1. ^oHoo-gaan-si ^ogee-dii ^odan-baan ^osoo habaabiraye (Boodheri)
1 2 3 4 5 6 7
2. ^oDaan-daansii ^owiil-kaa ^oyar waa ^olaga diqoodaaye
1 2 3 4 5 6 7
3. ^oDee-qay-nu ^osii-naa-ba waa ^oina dambaabsiine (Sayid)
1 2 3 4 5 6 7

II. Nooca labaad wuxuu noqon karaa laba siyood:

B- Mar uu lahaado 8 alan iyo 4 shaqal dheer (8+4=12)

1. ^oAan da-beeb-to ^oga-bay-gu waa ^odab iyo baaruude (Sayid)
1 2 3 4 5 6 7 8
2. ^oSawd gi-bin ah baa loo ce-shaa ^olaguma sooyaansho (Raage)
1 2 3 4 5 6 7 8

T. Marna wuxuu lahaan karaa 8 alan iyo 5 shaqal dheer ($8+5=13$)

1. A-daa^o koo-fi-low^o jii-tay-aan^o dunida joogeyne (Ismaaciil)
1 2 3 4 5 6 7 8
2. Is-maa-ciil^o a-daan^o daa-yin-kaa^o diinta laayicine (Sayid)
1 2 3 4 5 6 7 8

III. Noocanina wuxuu noqon karaa:

B- Mid ka kooban 9 alan iyo 3 shaqal dheer ($9+3=12$)

1. Nin la-baa-tan^o buux-sa-day^o ad-duun^o waa lagdamayaane (Salaan)
1 2 3 4 5 6 7 8 9
2. Ar-li-gaa^o la ka-la^o baa-ba-yaa^o nin u taal roone (F. Muur)
1 2 3 4 5 6 7 8 9

T. iyo mid ka kooban 9 alan iyo 4 shaqal dheer ($9+4=13$).

1. Xa-yow^o faa-ra-xow^o ha-dal rag waa^o loo xutubiyaaye (Sayid)
1 2 3 4 5 6 7 8 9
2. I-laa-hay^o ha ta-ban-taa-bi-yee^o ducada noo tuuni (Ismaaciil)
1 2 3 4 5 6 7 8 9

IV. Noocaan afaraad labadaan weji ayuu noqon karaa:

B. 10 alan iyo 2 shaqal dheer ($10 + 2$).

1. Si-da^o koor-ta^o yu-cub^o baa^o la su-ray korone buubaal ah (Raaga)
1 2 3 4 5 6 7 8 9 10
2. Go-ga-shaan^o ku jiif-sa-day^o hur-da-da goodkii igu yaacay (C.J. Saabiil)
1 2 3 4 5 6 7 8 9 10

T. 10 alan iyo 3 shaqal dheer ($10 + 3 = 13$)

1. A-na^o goel ka reeb ah^o oo nir-ga-ha^o lara kaxaynaayo (Raaga)
1 2 3 4 5 6 7 8 9 10
2. Xar-bi-ra^o i-yo^o ja-naaf-kaan^o la-haa^o xooxi ugu tuule (Raaga)
1 2 3 4 5 6 7 8 9 10

V. Noocaan ugu darbeeyana sidaamu u kala baxaa:

B. 11 alan iyo 1 shagal dheer ($11+1=12$).

1. Min-ka ga-can-ta mi-dig oo-dan-ta-hay laga ilroonaayee (F. Nuur)
 1 2 3 4 5 6 7 8 9 10 11

2. Lix-dan la-bi-ye to-ban-baan kor ma-ray wana la hubaae (Salaan)
 1 2 3 4 5 6 7 8 9 10 11

T. 11 alan + 2 shagal dheer ($11 + 2 = 12$).

1. Ga-bax la-gu sha-kaa-li-yo sen-gi-hii gaabi oodkiye (Saahid .)
 1 2 3 4 5 6 7 8 9 10 11

2. Rag-ga-se a-dhax-da i-yo oof-tu waa udub dhexaadkiyee (Raage)
 1 2 3 4 5 6 7 8 9 10 11

Shaxdaan waxay soo koobaysaa inta siyood uu Dhiska

beydka gabayga noqon karo:

SHADARKA HORE				SHADARKA DAMBE			BEYDKA IDIL		OO
Alamada	Alan	+Sh.Dh.	=W	Alan	Sh.Dh.	=W			
7	7	+ 5	=12	6	+ 2	=8	13	+ 7	= 20
8	8 (8	+ 4 + 5)	=12 =13	6	+ 2	=8	~~14~~ 14	< 6 - 20 < 7 - 21	
9	9 (9	+ 3 + 4)	=12 =13	6	+ 2	=8	15	< 5 - 20 < 6 - 21	
10	10 (10	+ 2 + 3)	=12 =13	6	+ 2	=8	16	< 4 - 20 < 5 - 21	
11	11 (11	+ 1 + 2)	=12 =13	6	+ 2	=8	17	< 3 - 20 < 4 - 21	

Gabayada soo socda oo ragga kala duwani tiriyeey aaynu ku ti-
jaabinno sharcigii horay loo soo dheegay inuu ku dhaqan gelayo
iyo in kale:

Halkii nabadda lagu soo dhigtiyo

dhaafe meelihiiye

Raggii dhuubsanaan jirey baatan

kala dhignaadeene

Oo weliiba dood iyo shir iyo

dheeryihiin amare

Dhalaankoodi hore jeer dambey

dhaxal u reebeene

Haddaad dhimato geeridu marbay

noloshu dhaantaaye

Dhadigaansho waa ceeb inaad

dhamagsataa meele

Nin dharbaaso ceebeed dugsaday

.dhaqayadeed maalye

Dhashaaday sugtaa xaajadaad

dhawrataa abide

Ma dhurmuumin Qaabiil markuu

dhacayey Haabiile

Dheemaaji dumarbuu ka kacay

dhiriftankoodiye

Dhidigoodku aadmiga horey

uga dhawaaajeere

(Salaan Carrabey)

Haddaad adigu ini taajir tahay

Tuurimada xoolaha nin baa

Wallee ina ragow talo adduun

Tamad aad ah adigoo noodee

Tunka ayaa ku soo qaban haddaad

Mid uun baa tasmada kaa degoo

Wallee ina ragow talo adduun

Wiil taaninimo loo filoo

Oo lagu tawxinaan legdimi

Mid uun baa tab kula soo baxoo

Wallee ina ragow talo adduun

Toolmoona haad waa inuu

Tuushkii mun iyo wiil yar waa

Taabkaa laguuri haddii

Wallee ina ragow talo adduun

Taraxeydha xaajada haddaad

Kid uun baa tallaani iyo dhaar

Wallee ina ragow talo adduun

tuhunto uurkaaga

tulud ku sii dheere

taada uun ma aha

fara ku taagleystay

tarad ku xaajooto

lagugu taagaaye

taada uun ma aha

sida talniigaasa

timaha booraynin

laga tixqaataaye

taada uun ma aha

tol u dhaxeeyaye

la isla tiirshaaye

kibir ku taabteaye

taada uun ma aha

takhasho waayeeh

taw la soo orane

taada uun ma aha

Haika toban nin joogtaba haddaad

Kan dambaad signiin tahay inay

Wallce ina ragow talo adduun

Tufta iyo tahliishiyo wadaad

Tadcaartiyo midkaan awqayow

Mid un baa tanbira soo dhigtoo

Oo tuuq ka dhige kaan lahaan

Wallce ina ragow talo adduun

turuqda kii aade

kugu tibeeyaaane

taada uun ma aha

qiraya towxiidka

yaraha tiimayno

tacajab yaabnaaye

waa lixdii Nebiyo

taada uun ma aha

(Qamnaan Bulxan)

Wax badan baan salaamiyo ahayn

Dhaaxaa sidii siiqa webi

Anba saatan inay duniyi noqon

° Oaku haddaan sama adduun

Wannadkii dhowaa Yuusuf baan

Sooraame aar baa habsadey

Siitoosiyaa Aadan cunay

Sanyaraan hogoogtiisa siday

Bahal bay ahaayeen kuwa

Maantaa salaankii ka jabay

saafi nabadeede

saa na loo wadaye

saabka kuma hayne

kor u siyaadayne

siigadii dhigaye

sararihii Muur e

sakhalki yaabnaaye

toban sabaaneede

saa u leeyahaye

Samatar Fool jecere

° Beydkaan na qumana.

Sarsar igu bannaanaa mus iyo	sud igu awdnaayede
Haddaan geed siyaab looga dhigin	saar ma joogsada e
Soojeedahaan ku hurdi jirey	salalki geeryooye
Suheeyr ma arko labadii indhood	ninay saruurmeene
Gobannimo raggii sare ka lumay	waa siraad damaho
Udir casabare guul saadanbaan	amase saakuun ah
Sunulkaraa soo loof nadii	badowgu sooyaamo
Raggii hawana kala iga raban jirey	laa saboolowye
Abba saynabkii Adari iyo	timiriti reer saaxil
Burka iyo barreenkood ku dubi	saanta dabadeeda
Sudna iga gelin dhuunigaad	soo day leedahaye
Hay siinin soortii shifa laa	lagu sudoodaaye
Sengihii xiniinyaha la jaray	waa sidaan ahaye
Sii kac oo iga tag oo igala bayr	soo noqnoqodkaaga
Igana seexo meel la'i saraan	seedo kaa go'ine
Ama saadda-ninadii haween	saacadba i toosi

(Raaga Ugaas)

Dhaafka tiraha dhaashiga wejiga
 Dhanda madag dhoollahaa yayar
 Dhegta magalka dhaayaha indhaha
 Dhalaalkeeda caymiga lafaha,
 Dhagaaggeeda socodkaa luyaha
 Dhiidhiibsigeeda dibnaha
 Dharka gaadashada naag xun bay
 Dhalada uma gudboona kuwaa
 Dhooboo kalay wada noodeen
 Allaan adiga kaa dhigin kuwaas
 Xaajada dhammaan iyo dhinmaan
 Dhaladkeeda inay fiirisay
 Dhegta wax iga maqashii

dhererka joogaaga
 dhuuda wanaa baqa
 dhuungashada naaska
 dhuuxa ka arcoosan
 dhawrashada ruuxa
 hadalka dhuunkiisa
 dhuda wareegtaye
 dhulalkan joogaaye
 dhoof kuwii toqaye
 gaalada u dhaxee
 dhirindhireynteeda
 iila dhowdahaaye
 si baan kuugu dhoolalaye

- - - - - o o o - - - - -

Tollaala'ay toddoba goor miyaan
 Turbigiyo xiddigihii miyaan
 Tiiraanyo iyo ciil miyaan
 Sidii ari tigaad cunay miyaan
 Tunka miyaa i buuxsamay sidii
 Laba saanac ii tunay miyaa
 Fa tokoorinkii ba magliqa
 La tallabadaydaa halahaa

xalayto soo toosay
 tiriyay oo eegay
 taws la ladiwaayey
 taaha ku cawceeyey
 toban jir awryaalaha
 tiirsan garabkayga
 taabacyo i yeeshay
 orad wax turaynin

Sida laanka tawlka ah miyaan
Belaayadan i taabde miyaan
Ma Cabdaa turaabka isku qayey
Ma tumaa sidii baan magliga
Goortaan ku taagsaday miyuu
Libaaxuba dhurwaa toban kumuu
Ninkii fara yaraan igu tuhmaa
Wallee aniga waa lay tax gelin

tahan u dheeraaday
toosin kariwaayey
waa tabtaan wadaye
tahan wax weydaarshey
talala'yoo reemay
tulud ka qaadaaye
talo ka hoostaaye
tiiriinimadayda

(Nuur Jiis Maqan)

Rag waxaan ku maamuli aqaan
Mase inaamu nahay oo tolnimo
Masallaha ninkaan ii dhigayn
Ninkii aniga iga maarmi kara
Muska ina Afey galo arlada
Ninkii mira yarbaa lagu dayaa

ama ku maamuusi
meerto noo tahaye
midig ma saaraayo
uma muraad yeesho
kama miciin moodo
yaan la ii muhanin

(Saahid Qammaan)

G E E R A A R

Ma jiraan wax inoo sheegi karaa waqtigii uu dhashay iyo halkii ugu horaysay uu ka yimid, laakiin waxaa marag ma doonto ah in geeraarku ka fac waynyahay maansada inteeda badan, go'doonna uusan ku ahayn afkeena keliya ee uu ku baahsanyahay bahda Kushii-tiga oo idil iyo kuwa kalaba. Oromaha waxaa lagu yiraahdaa Ge-raarsu waxaa lagu maansoodaa marka dagaal loo socdo iyo marka lagu soo guuleysto dagaalka iyo ugaarsiga. Amxaariga waxaa lagu yiraahdaa Agrarare, isagana guubaa**b**ada iyo guusha dagaalka ayaa loo tiriyaa. Halkaa waxaa inooga caddaanayso inaan geeraarku ku soo koobnayn af Soomaaliga keliye ee uu ku fidsanyahay geeska Afrika oo dhan iyadoo weliba ujeedd**o**oyinka loo tiriyaa isku wada mid yihiin amaba meela yar yar ku kala duwan yihiin. Waxaannaan halkaan ku caddayn karin saddexda af midkii ugu horreeyay oo curiyay geeraarka iyo sida uu u soo gaaray labada kale. Geeraarku ma aha mid ka hooseeya xaga qiimaha maansada inteeda kale haduusaaba badi kaga horayn. Waxaynu ognahay in dadkeemu ahaan jiray gaarna weli yahay xoola dhaqato nolosheedu ku xirnayd hadba dabecaddu halkii ay u horseedo oo ah mid marna u roon marna u daran. Dad is dhex yaacsan ma aayn ee waxay u kala yiilcen beel beel xigto ahaan isu soocata.

Kala qoqobnaantaasi waxay keeni jirtay inay beel waliba beesha kale colaadiso iyadoo taasi ka dhalanyay biya la'aanta, baad la'aanta, xoola la kala dhaco, dad layska dilo, maanso meel ka dhac ah oo laysi tiriyo i.w.m.

Geeraarku wuxuu ahaa mid dhiilo warmaha iyo leebabka la isugu qaato kiciyo, oo gole hoog, halaaq iyo gabagabo horseeda.

Inkastuu mar mar horseedo hilin hoog ahaa misana ma ahayn mid had iyo jeer u joogo dhiilo iyo dhabar jab ee wuxuu gayb aan la hilmaami karin ka qaadan jiray (kana qaataa) kicinta bulshada, dhii-rigelinta, negaynta badadda, faanka, dabaal degga iyo amaanta fardaha.

Beryihii hore waxaa caado ahayd in geeraarka laga tiriyo farras duxshiis inta badan, taana waxaa inoo caddayn kara geeraarka oo badanaaba looga hadlayo ama lagu faaninayo fardaha.

Raggii geeraarka ku caan baxay oo markii codkooda la qa maqlo murtidooda loo wada dheg raaricin jiray waxaa ka mid ahaa: Sayid Max'ed Cabdulle, Ismaaciil Mire, Faarax Nuur iyo rag kaloo badan.

MIISAANKA BEYDKA

Inkastoo geeraarku ka mid yahay maansada inta ugu caansan, haddana ka gedisan habka ay u dhacayso maansada intedda kale xag-

ga luuqda iyo jiiibkaba. Sidaas awgeed ayaa geeraarku leeyahay sharci u gooni ah oo la tirinayo alamada kaliya iyadoon lagu derin shaqal dheerayaasha. Marka lagu luuqaynayo looma jiijiido sida gabayga ee waa la dedejiyaa, alamadiisana way go'an yihiin ee ma aha sida gabayga oo kol badan karaan marna yaraan karaan.

Geeraarka beydkiisa waa hal shadar keliya kaasoo ka kooban badaanaba 7 alan.

T u s a a l e:

1. Had - daad weer is - ku duub - to
1 2 3 4 5 6 7

2. An - na waan is - ku waa - bi
1 2 3 4 5 6 7

3. Had - daad daw - lad - da wey - do
1 2 3 4 5 6 7

4. An - na tay - du we - dow - day
1 2 3 4 5 6 7 (Wiil Waal ama Ugaas Nuur)

Geeraarku wuxuu kaloo lahaan karaa beydad leh 6 ama 8 alan, kuwaaso leh astaamo looga sooci karo kuwa kale oo 7 alan ah.

Waxaana lagu kala garan karaa o shardi ah qawaaniinta soo socota:

'B. Qaybta lixda alan leh: waxaa u shardi ah in:

1. Beydkiisu ku dhammaado shaqalka dheer "aa". Badanaana beyd-
kaasi wuxuu noqdaa midka tixda lagu soo hoorinaayo.

T u s a a l e:

Mee - laan wuu la - la gaa - rin
1 2 3 4 5 6 7

Had - dii wii - ris ka yee - ro
1 2 3 4 5 6 7

Waq - ti buu maq - la - yaa - ye
1 2 3 4 5 6 7

Ma taar baa wed - da - naa (Sayid)
1 2 3 4 5 6

Had - duu saa - ki - mi waa - ye
1 2 3 4 5 6 7

Sal - li - gaan u dhi - gaa
1 2 3 4 5 6

Is - ka see - ~~xo~~ i - dhaa (F. Nuur)
1 2 3 4 5 6

2. Beydki wuxuu kaloo uu lix alan lahaan karaa marka tixda la soo
hoorinayo beydkiisa u dambeeya, hase ahaatee aan aakh^{ir}irkiisu
" aa " ahayn. Beudka noocaas ahina aad bay ugu yaryihiin gee-
r raarada.

T u s a a l e:

Ra - yid waa ki - rish - taan - noo
1 2 3 4 5 6 7

Koo - fil wee - ye dha - shii - soo
1 2 3 4 5 6 7

Kaa - ha la - gu da - reer - sho
1 2 3 4 5 6 7

Kow - laan - teed rag ku baan (Sayid)
1 2 3 4 5 6

T. Qaybta Siddeedda alan leh:- waxaa u shardi ah in :

1. Beydku ku dhammaado xiriiriyaha " iyo ".

Xiriiriyahaasu ha ahaado mid ku dheggan ama ka go'an beydka
eraygiisa ugu dambeeya, sida:

Tu s a a l e:

Gee - raar waa nin wa - naa - ji - yo
1 2 3 4 5 6 7 8

Nin wa - raa ka - ga ood - mi - yo
1 2 3 4 5 6 7 8

Nin si - day - da war - kii - si - yo
1 2 3 4 5 6 7 8

Wac - di - gii - sa ya - qaa - ne (Raage)
1 2 3 4 5 6 7

Gee - la wee - ta ir - maan i - yo
1 2 3 4 5 6 7 8

We - ris - tii ri - ma - nayd i - yo
1 2 3 4 5 6 7 8

Wa - daad buu er - ya - daa - ye
1 2 3 4 5 6 7

Na - bar xoor - le mi - yaa (David)
1 2 3 4 5 6

2. Waxaa kaloo beydka siddeed alanle ka dhigi kara hadday beyd-
ka eraygiisa dambe gadaal ka raacaan Xiriiriyaaalka ay ka mid
yihiin " oo, na " iyo astaamaha yeeriska " ow ama yow ".
Gaar ahaan Xiriiriyaha " oo" beydka hadduu ku dhammaado, beyd-
kaasi wuxuu noqon karaa 7 ama siddeed alan; sidaas awgeed
waxaa kuu muuqaneysa in uusan Xiriiriyahaasi lahayn qawaaniin
loo raaco oo cad.

U fiirso tusaalayaasha soo socda:

T u s a a l e " oo " :

Mar - kii ay cid - du guur - ta - yoo
1 2 3 4 5 6 7 8

Gar - na loo ra~~a~~ - ri - waa - yey (Ismaaciil)
1 2 3 4 5 6 7

Du - shu waa wan - qa - raa - roo
1 2 3 4 5 6 7

Waa wa - laa - yad qur - xoo - noo
1 2 3 4 5 6 7

Wa - sakh loo - ra - ma yaa - bee
1 2 3 4 5 6 7

Ma xa - riir wir - qan - baa (Sayid)
1 2 3 4 5 6

T u s a a l e " na " :

Keel - ay guhl - dar - ro joor - ta - na
1 2 3 4 5 6 7 8

Qa - rab loo - ra - ma yaa - bee (Ismaaciil)
1 2 3 4 5 6 7

Nin si - daas u ya - qaa - ni - na
1 2 3 4 5 6 7 8

Ba - ko aa - khi - ro moo - yee
1 2 3 4 5 6 7

Suu - daa - noe ku - ma dhii - bo (Ismaaciil)
1 2 3 4 5 6 7

T u s a a l e " yow ":

Guul - li - hii i a - buur - ta - yow
1 2 3 4 5 6 7 8

Gaa - jo qoob cu - lu - saa
1 2 3 4 5 6

T u s a a l e " ba ":

Nin - kii haan - ta ka waab - shi - yo
1 2 3 4 5 6 7 8

Wal - lays - kaa ga - rab joo - ga - ba
1 2 3 4 5 6 7 8

Wi - yil qoo - dha~~q~~ mi - yaa
1 2 3 4 5 6

X u s u u s .

Geeraarku suda maansada inteeda **kale** oo dhan, wuxuu noqona-
yaa mid dhismahiisa iyo miisaankiisuba kala dhantaalan yihiin had-
daan sida curiyaha geeraarku wax isugu dheelitirayo ama ugu dha-
waaqayo loo qorin. Waa gain la kala gooyaa hadduu maansaagu laba
eray mid ka wada dhigo.

T u s a a l e :

~ Maanuunta uu xarfinaaya oo

(9 alan)

Xiisaddeeda culaayo

W a l a d

Ain habaas haraawa iyo

(10 alan)

S a x	Qaamuuntuu xarfinaayoo	(8 alan)
	Xiisaddeda lulaayo	
	Xin habaas ka koraayo	(8 alan)
	Xusur dheehan miyaa	(Sayid)

Tan kale waa in la ogaadaa inaan Xiriiiriyayaasha kala ah,
 " iyo, oo " lagu bilaabi karin ~~geera~~ geeraarka beydadkiisa. Waxay
 geli karaan oo keliya dhammaadka beydka ama dhexdiisaba.

T u s a a l e:

Guul - li - hii i a - buur - ta - yow	
1 2 3 4 5 6 7 8	
Guu - meys reer u sha - qay - sa	
1 2 3 4 5 6 7	
<u>I - yo</u> gu - ri xaa - jo xu - maa	
1 2 3 4 5 6 7 8	Q a l a d

Haddaad u fiirsatid tixdaan ee geeraarka ah oo tusaale ahaan-
 ta aynu u qaadanay waxaad arkeysaa in tixda labadeeda beyd oo dam-
 be si qalad ah u qoran yihiin, tiradii alantuna anay sidii ku hab-
 boonayd isu raacin, taasoo ay keentay Xiriiiriyaha "iyo" oo la doo-
 nayey inuu beydka labaad gadaal ka raaco la soo raacsiiyey beydka
 saddexaad oo xagga hore ka galay. Siday shuruud ahaydna beydka
 dambe waxaa la rabay marba hadduu "aa" ku dhammaado inuu ahaado
 lix alan, hadda oo ay "iyo" soo raacadana wuxuu noqday 8 alan .

Marka waa qalad.

Tixdii oo si sax ah u qoran waa tan:

Guul - li - hii i a - buur - ta - yow
1 2 3 4 5 6 7 7

Guu - meeys reer u sha - qay - si - yo S a x
1 2 3 4 5 6 7 8

Gu - ni xaa - jo xu - maa
1 2 3 4 5 6 (Ismaaciil)

Rugta Shaqal Dheerayaasha.

Inkastoo tirada dhiska beydka geeraarka aanaan ku darin shaqallo, waayo almada ayaa go'an oon u baahneyn dhamaystir sida gabayga oo uu tirada alamada had iyo jeer ku dhamaystiraa shaqal Dheerayaasha, haddana wuxuusan, marna ka marnaan karin beydka geeraarku shaqal dheere. Ugu yaraana waa in beydkiiba laga helo laba shaqal dheere. Waxaana shard u ah in mar walba laga helo alanta 3aad iyo tan 6aad. Waxaa ka xaaran ah in beydku uu shaqal dheere ku lahaado alanta 4aad iyo tan 5aad. Labadaasi shardi la'aantood beyd geeraar ah oo quman lama curin karo.

Almada haray oo kala ah laad, 2aad, 7aad (iyo 8aad haddii beydku siddeedle yahay) kama takooro shaqal dheerayaashu, in laga helaana

Sa - xa - yoo ma xu - may - noo

Sar - ma - seeg - to u dii - da - yoo

1 2 3 4 5 6 7 8 (Sayid)

Miisaanka beydka Geeraarka

Tirada	Rugta Shaqal Dheerayaasha	
Alamada	Waa Rugta Alanta	Shuruuddada
6	3aad - 6aad	waa khasab
7 (caadi)	4aad - 5aad	ka caagan
8	1aad, 2aad, 7aad (8aad)	kama reebana sha- radna ma aha

Tilmaan Faras.

Geeraar waa nin wanaajiyo,

Nin waraar ka ga oodmiyo,

Nin sidayda warkiisiyo,

Wacdigiisa yaqaane,

Walhadow faraskayga,

Weedh yar oon ku ammaaney,

Howga maan ka bilaabo.

Gammaan waa kala waare,
 Weehadow orodkiisu,
 Waadhaf deyn laga xooriyo,
 Taarka layska warqaadiyo,
 Ma wayeenka shukaantoo,
 Wanaag loogu qabtaa,

- - o O o - -

Weyraxow camalkiisuna,
 Waraabkaan u kexeeyo,
 Isagoon wada laacin,
 Anigoo wada mooyee,
 Ninkii haanta ka wabshiyo
 Wallaayskaa garab joogaba,
 Widhiidhuu ku dilaaye,
 Wiyil qoodhaa miyaa..

- - o O o - -

Weedhaanshow dhaqsihiisuna,
 Ma wareege libaaxoq,
 Intuu neef ka web siiyey,
 Wid haddii la yidhaahdo,
 Wankallaadi u boodka,
 Dadka waabinayaa.

- - o O o - -

Werisow midabkiisuna,
 Cirka oo wadhanaayoo,
 Wahabkii laga qaadiyo,
 Wirriila aan caddaaniyo,
 Ma~~a~~ waagoo sagliyaa.

- - o O o - -

Wajigiisa arsaamduna,
 Wax haddaan ku erayaayo,
 Ma waddooyinka ceelkoo,
 Reebku aad u warmeeyiyo,
 Waadigoo rogmadaa.

- - o O o - -

Meel waylaaqtan col joogoo,
 Warma laysku ridaayana,
 Wadnahaan ku kabaaye,
 Wiil uu Eebbe ku siiyiyo,
 Ma walaalkay rumaa.

- - o O o - -

Haddaan heegga ku weedhan,
 Ka wareeji idhaahdo,
 Wajaquu ambadaaye,

Madaxuu kor u waalliyo,
 Indhahuu ka wig siiyayo,
 Wiyiewaayac curraafiyo,
 Wa waxsheeg sixiraa,

- - o O o - -

Waran waaxyaha gooyiyo,
 Wayab qaarka madow iyo,
 Riddo/ soo widhwidh laysiyo,
 Wajaafkeeda rasaastuu,
 I weydaarinayaaye,
 Ma wadaad xigtadaayoo,
 Wanaaggiisba arbucuunka,
 Waligiisba yiqiinoo,
 Wan intoodu u qashay,
 Wadduxaaga quraankiyo,
 Walleyl kuu akhriyaa.

- - o O o - -

Dadka oo wada seexday,
 Haddaan oodda ka weechana,
 Waddankaan ku shakaalo,
 Ma weydaaran yaqaanne,
 Ma wanaagsan gabdheedoo,

Waalli kuu gogoshayoo,
 Wareegeysa dushaada oo,
 Waddigaad ku lahaydiyo,
 Waanadii aqbashaa..

(Raage Ugaas)

Rag Sabaan..

Rag sabaan ka sabaan baan,
 Samaantuun badiyaa,
 Hadduu saakimi waayo.
 Salligaan u dhigaa,
 Iska seexo idhaa,
 Hadduu saakimi waayo.
 Caanihii hashaa suub baan,
 Saddex goor u lisaa,
 Ku sariigo idhaa,
 Hadduu saakimi waayo.
 Sumalkii rugta joogiyo,
 Sogobkaan u qalaa,
 Hadduu saakimi waayo.
 Sarriiggii Cadameed baan
 Subagawga badshaa,
 Hadduu saakimi waayo;

Gabadh suurad wanaagsan baan

Surraddawga dhisaa

Hadduu saakimi waayo.

Xoolo gooni u soofiyo

Sadadaan ku ladhaa

Hadduu saakimi waayo.

Seeddow mood iyo nool iyo

Salaantan u badshaa

Hadduu saakimi waayo.

Salaaddaan lallabaayoo

Salinkaan qabsadaayoo

Maydal suulal madow iyo

Sulub Eebbe ku joogtaan

Sarartaa ku dhuftaa

Sambabkaa ka baxshaa

Markaasuu salimaa

igu sakin noqdaa.

(Faarax Nuur)

Ma Sabaan ka Sabaan.

Ma sabaan ka sabaan baan,
 Nabad saafi ahaayoo,
 Sukuudoo edeb yeeshayoo,
 Dawd xun aanan lahayn.

Ma sabaan ka sabaan baan,
 Salowgaan kicinaayiyo,
 Maryankaan oryanaayiyo,
 Sakhraankii iska daayey.

Ma sabaan ka sabaan baa,
 So'yaqaanka dugaaggiyo,
 Haadkii aanu sabeyney,
 Soominnoo qadinnayoo.

Ma sabaan ka sabaan baa,
 Safarkaygu xirnaayoo,
 Suuqayadii Bullaxaar iyo,
 Saaxil aanan tegeynoo.

Ma sabaan ka sabaan baa,
 Sabadii Cagaciid iyo,
 Suubaankii Ballishiil,
 Soobir aanan ku maalin.

Ma sabaan ka sabaan baa;
 Sida siigiiyo cawsha,
 Saraar meerid ahaayoo,
 Sabaab beena ku daayay.

Ma sabaan ka sabaan baa,
 Silcayeyda haweenkiyo,
 Salowgii ka baxaayey,
 Saraarkii gelin waayey.

Ma sabaan ka sabaan baan,
 Ergo soogan ahaayoo,
 Suudigii aan maraayey,
 Sammadeeyey jirkeygoo,

Ma sabaan ka sabaan baan,
 raggaygii la sadqeeyey,
 Soofkaygii la xaraashay,
 Sed yaa iiga ceshaa,
 Subax noobla lahaa.

Ma sabaan ka sabaan baan,
 Suxeynow in daa iyo,
 Sarkaalowda hayeeyoo,
 Saamacow lagu waayey.

Ma sabaan ka sabaan baan,
Su'aashii Rabbigay iyo,
Suubanow Nebigii iyo,
Saalixiinta xusaayayoo,
Saacaygii i hayeey.

Saxayoo ma xumaynnoo,
Sarmaseegto u diiddayoo,
Sowd kalaa daba yaalle,
Balaan kaana sifeeyo..

Ma xalaa la i suurshoo,
Samadaa la i geeyoo,
Seleloo isla boodayoo,
Saarkaygii qabtayoo.

Ma sawaadka habeen baan,
Inaan suulasha laabtiyoo,
Sin inaan u fariistiyo,
Seexadkii kerii waayayoo..

Ma salaadda Ilaah baan,
Sahwiyo garan waayey,
Ma soortii aan cunaayaya,
Sibir ii dhadhantayoo.

Ma sawaalka boqoolaan,
Sardankaan guntanaa iyo,
Sammaaddii aan maraayaa,
Sugulkaa iga yeelayoo.

Ma suugaanta nabdeed iyo,
Samaan baan la heleynoo,
Inaan saamax ahaadaan,
Sina loo arkihaynoo.

(Sayid)

B U R A A N B U R

Buraanburka waa nooc maansada ka mid ah una gaar ah dumarka, wuxuu xagga qiimaha garab socdaa maansada inteeda kale, oo horay u soo aragnay.

Buraanburka taariikhdiisu inta ay gaarsiisantahay lama oga, hase yeeshee dadka u go'ay suuraantu waxay leeyihiin buraanburku wuxuu ka soo askumay magaalooyinka. Waxaana laga tiriyaa goobaha aroosyada, guubaabada, dagaalka, ammaanta i.w.m.

Buraanburku wuxuu kaga duwanyahay gabayga, geeraarka iyo jiiiftada isagoo leh laba siyood oo loo qaado. Qofka gabaa, geeraara ama jiiiftooda isaga keli ahaanti ayaa laga dhegaystaa, intuu shir iskala taago. Hase ahaatee buraanburku ka duwan sidaas oo waxaa jira inay sida maansada kale haweenay goob kaligeed ka qaadi karto isagoo jiiib iyo luuq gooni ah leh, taasi waxay dhacdaa markii uu yahay guubaaba, dagaal-gelin, kicin bulsho i.w.m.

Jaadka labaad waa marka gooba farxadeed laga tirinayo sida aroosyada, ciidaha i.w.m.

Kooxda gooba qof keliyihiin qaadee waxaa gadaal ka noo'iya koox, jiiibka iyo luudana waxaa tarxa sacab iyo jaan sida hees cagaaroodka oo kale.

Halkaas waxaa ka qaddaantay in loo isticmaalayo siifi hees cagaarood, taasina waa in ay walaysho kartaa in ay soo qaddaantay.

Dumar ku gaadi jireen miyiga sida hees caruureedka, hees kebedeed-
ka iyo hees cayaareedka, kadibna is bedel xagga luugda, jiibka
iyo hees dhiska boydka ku dhacay. Xagga dhiska boydka waxay isaga
egyihiin gabayga, maxaa yeelay shadarka dambe waxay ka wada koo-
banyihiin 8 oo ah wadar alan iyo shaqal dheere.

Kaladaasi waxay jawaab iyad na mala ah ka bixinaysa waydiinta ah:
Suugaanta Soomaaliyeed waxay ka soo jeedaa miyiga ee maxaa buraan-
burka ugu dhashay boledka?

Sida shayba, guureowga iyo jiiiftada dadkii tiriray loo ma-
suusto, buraanburka dadkii tirin jiray looma yaqaan, maanta na ji-
ro qof 70 sano ka hor buraanbur tiriray oo la yaqaan, taasina wa-
xay ku dhacday oo loo maleeyaa in uusan jiri jirin muddadaa kahor.
Waxay inala tahay inaan aduunyada inteeda kale qaybsaneen oo ay
ama wada heesaan ama wada maansoodaan innagase raggu waa gabyaa,
geeraaraa, guuroobaa ama jiiiftoodaa, dumarkuse waa buraanburaa
taasina waa wax la yaab leh gariibna ku ah suugaanta.

Taa micnaheedu ma aha inuusan dumarku gabyi karin ragguna buraan-
buri karin. Dumar tiriyo gabayo wanaagsan ayaa jiraan, sida Sa-
yidka walaashiis Jammaad Sh. Cabdulle Xasan oo tirisay gabay dheer
oo aad murti u leh, iyadoo ku halqabsanaysa Xuseen Dhiqle waxay
ku bilowday: " Xuseenow qof meel laga hayoo - maahsan baan ahaye ".
Rag buraanburayna waa jiraa. Maxaa jirey nin reer Qandala ahaa
(Xambaarsey) oo in muddo ah ku salanka buraanburku u saarnaa wax

rag iyo haween ah oo soo agmarana la waayey. Ninkaasi ma gabyi jirin mana geeraari jirin si layaab leh buu se u buraanburi jiray. Bal u fiirso tixdaan buraanbur oo soo socoto, waddankoo idilna aan ku ah, waxaana tiriyay nin naagtiisu daawaysey oo maxkanad-dii wax u qaban weyday, wuxuuna ku yiri:

" Waxaa kaa raacay mee	shii laxoon sanaa
Xafiis tegiddii muu	kaa xayiray wanaag
Xurno Allaa lehe muu	xaasid kugu markada "

Kiisaanka Beydka Buraanburka

Beydka buraanburku wuxuu ka kooban yahay laba shadar oo kala dheer. Shadarka hore haddii alamadiisa iyo shaqallada dheedheer laysku daro waxay ku imaanayaan 10. Shadarka dambe wadarta alamadiisa iyo shaqal dheerayaashiisa waa 8. Mar mar dhif ah baa shadarka hore ~~koow~~ iyo toban (11) noqdaa. In buraanburku ka mid yahay suugaanta cusub waxaa inoo caddaynay-
sa in eray shadarka hore ku dhammaanayo oo noqdo mid labada sha-
dar kala raaca aan ku ekaan shadarka hore sida qaynuunka maansada
inteeda kale oo la tiriyo ey qabto kala go'aan kor ku soo sheegnay
waxaa inaga deeqayo beydkaan buraanbirka ah oo soo socda:

" Nabaddu waa doore <u>soo</u>	<u>maaliyeey</u> is daa "
1 2 3 4 5 6 7	1 2 3 4 5

Erayada sidaas u kala go'an lagana helo maansada filka wayn, waxaase

ku ku caan ah heesaha oo (ah- suugaanta casriga ah, taasina waxay sii ayidaysaa curdannimada iyo madaninimada buraanburka.

Miisaanka Beydka Burzanburka

Shadarka Hore				Shadarka Dambe				
L.	Alan	Sh.Dh.	Wadar		Alan	Sh.Dh.	Wad.	Rugta Sh. Dheerayaasha
1	6	+ 4	= 10	10	5	+ 3	= 8	alanta laad, 3aad, 5aad
2	7	+ 3	= 10		6	+ 2	= 8	" (1°, 3°) ama (1°, 6°
3	8	+ 2	= 10		7	+ 1	= 8	" laad
4	9	+ 1	= 10					
1	7	+ 4	= 11	11				
2	9	+ 2	= 11					
3	8	+ 3	= 11					

Shadarka hore.

Shadarka hore guud ahaan wuxuu ka kooban yahay toban ah wadarta alamada iyo Shaqal dheerayaasha.

Marna 11 ayuu noqon karaa. Shadarkaan inkastoo wadartiisu ay go'antahay (10 ama 11), haddana tirada almada iyo shaqal dheerayaashu ku dhamaystiran way is bed bedelaan, oo shan siyood bayna noqon kartaa:

I. Shadar ka kooban 6 alan & 4 shaqal dheere.

Tusaale: (6 + 4 = 10)

I -	^o naa -	^o naan	^o baa -	^o qa -	^o nayn	bugagay ku taal
1	2	3	4	5	6	

^o Waa	ku	^o oo -	^o yaan	da -	^o yu	ray ku eegayaan
1	2	3	4	5	6	

2. Shadar ka kooban 7 alan & 3 shaqal dheere.

(Noocaan ayaana u badan buraanburka)

Tusaale: (7 + 3 = 10)

Ga -	ba -	dhu	^o waa	^o faa -	^o du -	^o mooy	wiilka waa Maxamed
1	2	3	4	5	6	7	

in -	^o taa -	dan	cad -	^o daan	ca -	^o biid	baanmu wada ahayn
1	2	3	4	5	6	7	

3.. Shadar ka kooban 8 alan & 2 shaqal dheere.

Tusaale: (8 + 2 = 10)

Ca -	lan -	ka	^o noo	su -	ran	ku -	^o wii	saaray baanmu nahay
1	2	3	4	5	6	7	8	

^o Caa -	sha	cu -	rad -	^o kaa -	ga	cab -	dul	laahi loogu yeer
1	2	3	4	5	6	7	8	

4. Shadar ka kooban 9 alan & 2 shaqal dheere.

Tusaale: (9 + 1 = 10)

Der - bi - ga ni - man - kii^o xi - gi - yo Doollo iyo Wardheer
1 2 3 4 5 6 7 8 9

Gab - dha - ha o - ro - bo^o - yin wad - dan kooda way arkaan
1 2 3 4 5 6 7 8 9

Shadarka hore marar dhif ah buu noqonkaraa mid ka kooban 11, alan iyo shaqal dheere iskujir ah 3 si unbuu koow iyo tobonle ku noqon karaa; waa marka uu:

1) 7 alan & 4 shaqal dheere leeyahay (waana dhif):

Tusaale: (7 + 4 = 11)

Ways - ku faa - yaa - ne^o ma - xaa^o loo faduulinnaa
1 2 3 4 5 6 7

2) 8 alan iyo 3 shaqal dheere (saddexdooda noocaan baa ugu badan).

Tusaale: (8 + 3 = 11)

Qaa - biil^o qa - biil^o daa - ya^o i - yo qaali baa i dhalay
1 2 3 4 5 6 7 8

3) 9 alan & 2 shaqal dheere (waa dhif):

Tusaale: (9 + 2 = 11).

war - diir^o xa - raar^o ma la - ha rag - gi daarta noo fadhiyey
1 2 3 4 5 6 7 8 9

Shadarka dambe.

Buraanburka shadarkiisa dambe wuu ka callan yahay kan hore.

Sidaan horay wuu soo sheegnayna aad buu ugu dheerahay shadarka

dambe ee shayga, xa - a dhifka. Guud ahaan shadarkaas waa inuusan

Ka badan kana yaraani 8, alan iyo shaqal dheere laysku daray ah.

Haddan sii geexno tarada alinta iyo shaqal dheerayaashu saddex

siyood un bay noqon karaan:

1. Shadar ka kooban 5 alan iyo 3 shaqal dheere.

tusaale: ($5 + 3 = 8$)

Socdaal kii jiray iyo soo	naa - li	kii	maq - naa
	1 2	3	4 5
Calool muulaa caruur	tay - da	aa - ba	- hood
	1 2	3 4	5

2. Shadar ka kooban 6 alan & 2 shaqal dheere.

tusaale: ($6 + 2 = 8$)

Hadduu geelu ololka goo	goo - yo	had - di	- yo	goor
	1 2	3 4	5 6	
Gartiis weeyaano raban	too	bax - duu	og - ya	- hay
	1 2	3 4	5 6	

3. Shadar ka kooban 7 alan & 1 shaqal dheere.

tusaale: ($7 + 1 = 8$)

Doonadiyo hawdka iyo	mee - sha	da - ran	- ta	ba - dan
	1 2	3 4	5 6	7
Maxaa kuwayaga inkaa	roo	ih - dha	- ha	ka ri - day
	1 2	3 4	5 6	7

Rugta Shaqal Dheerayaasha.

Beydka buraanburka shadarkiisa hore rugta shaqal dheerayaasha is rog roggeedu wuu badan yahay, shadarka darto se qawaaniin galan buu loeyahay sida rabayga.

Hor iyo horraan wanaa ka xaaraan ah in alanta 2aad ay joolato shaqal dheere. Inta kale ee shaqal dheeruhu waa ku imaan karaa,

saas ay tahay shadar dhaxdiisa shaqal dheeraha ucel walba lagana heli ee rugtu waxay ku xirantahay tirada alanaada uu shadarku leeyahay.

1. Haddii shadarku leeyahay 5 alan iyo 3 shaqal dheere rugtoodu waa alanta laad, 3aad iyo 5aad.

Tusaale:

Dannood fawgiisa iyo	°	°	°	°	°
	baa	- fi	- hii	War	- dheer
	1	2	3	4	5
abaddu waa doore soo	°	°	°	°	°
	baa	- li	- weey	is	doe
	1	2	3	4	5

2. Harka shadarku uu leeyahay 6 alan iyo 2 shaqal dheere rugta shaqal dheerayaasha waa alanta (laad, 3aad) ama (laad, 6aad).

Tusaale:

Kidaan bebahay xurayn	°	°	°	°	°	°
	baa	xu	- maan	dhax	- dhi	- gay
	1	2	3	4	5	6
Haddaad garan weydo gaa	°	°	°	°	°	°
	baab	- si	wax	u	- gu	dheeg
	1	2	3	4	5	6

3. Halka shadarku yahay mid ka kooban 7 alan iyo 1 shaqal dheere, rugata shaqal dheeruhu waa alanta (laad) ama (4aad)

Tusaale :

Cartaad noo goysay Rabbi	°	°	°	°	°	°
	gooy	- han	- ne	- gu	gal	- la - do
	1	2	3	4	5	6

Bisinka yaasiinka Raabi	ka - xa - ka	ba - ra - ka - diis
	1 2 3	4 5 6 7

E.B.

Waaqallada " oo iyo ee " haddii ay ka billaabnaa boydka
 ee aha in ay ka mid yihiin mar walab tiifa boydka, ee waa korsaar
 oo luuqda lagu harsado waana laga naarmi karaa. Sidaas awgeed,
 markay bilowga yihiin yaan tirada lagu arin.

Hadduu goolu ololka goor	gooyo haddiyo goor
Gartiis weeyaano gaban	too baxduu ogyahay
Hadduu geesiguna gee	raaro hadiyo goor
Gartiis weeyaano guluf	soo buxuu ogyahay
Haddii gaaridu hilaab	boyo haddiyo goor
Garteed weeyaano guri	gay ku gees martaa.

- - - - - o O o - - - - -

Bisinka ka billaaba shay	daan ha bayyagee
Malaaikta daakiray	saa ha soo degtee

- - - - - o O o - - - - -

Gabadhu waa faadumoo	wiilka waa Maxamed
Waysku faayaane maxaa	loo faduulinaa

- - - - - o O o - - - - -

Calool mugulaa caruur	tayda aabbahood
Intuu i cagooyey buu	Caasha luul i yiri

- - - - - o O o - - - - -

Calanka soomaaliyee	dow carshiga ka nuur
Cirkaad u egtahaye Rabbi	yow iagaa cabaado
Annagu huu cayshnay ilma	haagu ku cayilee
Intaadan caddaan cabiid	baannu wada ahayn
Allow noo kaa calfe	waannu ciilanayn

- - - - - o O o - - - - -

Waa tii Afrikaanku uru	noo la wada ogaa
Waa tii Ardisababa lagu	qaatay aaminimo
Waa tii lagu ooday Afri	kaanku weysku aqal
Aaraa'diyo hadalkii waa	tii la wada ayiday
Adduunka lama sheegay Afri	kaanna wada sexee
Itoobiya waxa ka dhacay	waa la wada erkaa
Waxay ku abaatay yaa	ii iftiimin kara

Diigoolkii Farans waa dhinac	huu i duban hayaa
Dcollarkiiyo laanta dahab	huu ku iibsadaa
Kadba ninlaku doonayuu	daawa kula dhigtaa
Sidii geel dayr dhaluu	doobi ugu citaa
Mar diir kareer na lama	raggi daarta noo fadhigay

Dadyow Boomaliyeed	wead ka daahan tahay
Waa dareen culuse shicib	kow dan ugu istaag.

(Xaliima Boofa)

- - - o o o - - -

Darriiqa Hollywood warkay	nooga soo direen
Sidaan u dancaday caloo	shaydi weli ka damin
Raggii na daafici lahaa	bay haddeer dileen
Yaan naloo darine soo	maaliyeey isdaa
Derbi la'aan bay ku isa	yeen saaxaashan diric
Doonadiyo ahawdka iyo	neesha daranta badan
Daaqi kari waayey gee	lii dareeri jirey
Ee nabaddu waa doore soo	maaliyeey isdaa
Asay bay dumarka qaa	daan diraac walbaba
Doorarkii qabayna haad	baa daleel ku cunay
Ee yaan naloo darine soo	maaliyeey isdaa
Duuno iyo cudurba awal	baan la daadsanayn
Gaalku waa ina dulle	yaa dan noona galo
Lagana daaweeyo ruu	xeenni dakhar ku dhaco
Ee yaan naloo darine soo	maaliyeey isdaa
Dawladaha uno ka yimid	way na dayahayaan
Waxay damacahayaan xuriiyad	deenni inaan la durin
Yaan naloo darine soo	maaliyeey isdaa

Saxaashanka dawladdood

xaalkii kula dacwiyey

Xaqii Cabdullahi noo

doonay waa diyaar

Ee yaan naloo darine soo

maaliyeey isdaa

(Xaawa Jibriil Maxamed)

- - - o O o - - -

Gabdhaha orobooyin waddan

kooda ray arkaan

(Oo) waa ku ooyaan dayuu

ray ku ooyayaan

Maxaa kuwayaga inkaa

roo indhaha ka riday

- - - o O o - - -

Qabiil qabiil daaya iyo

qaali baa i dhalay

Sidii garuumsadka

waddan kiina ugu qarxada.

- - - o O o - - -

J I I F T O

Waa qayb ka mid ah maansada, waana kuwa uu jiidaha iyo baayaha wayn oo dadka aad ugu dheer raariciyo, una kacaansado marka qof aftahan ahi gaadayo.

Inkastoo aad mooddo inay gabayga isu dhowyihiin xagga hilibada haddana waa ku kala duwanyihiin xagga jiidka iyo luuqda.

Dadka kala dhiliffa maansada ku xeesha dheer waxay leeyihiin ka dhadhan macaan gabayga iyo geeraarka waase haddii qof xariif ku ahi gaadayo.

Xagga kaca waxaa lagu tilmaamaa inay aafka hore uga jirto maansada soomaaliyeed.

Jiiftadu waa maanso dhowr qarni soo jirtay mawaadiicda lagu la maansoon jirana aad bay u farabadan yihiin sida: Dagaalka, guubaabada, diyaarada, faanka, ammaanta, dira-diraha, habaarka, ducada, kicinta bulshada iyo kuwa kaloo la mid ah.

Gabayga, guuroga iyo geeraarka markii la tirinayo waxaa la arkaa in qofka dhagaysanayaa maqalkooda ku daalo; kuna caajiso, jiiftaduse, qofku waa u sii xiisooda waana u sii hanqal taagaa. Waxaa dhici karta inuu saacado badan u sii dheg raariciyo isagoo u sii jadbaysan ku raaxaysiga luuqdeeda.

Dadkii waawaynaa oo jiiftada caanka ku ahaa waxaa ka mid ah:

Bayid Max'ed, Cusmaan Y. Keenadiid, Cali Xuseen iyo rag kale oo badan.




°Dhiska Beydka Jiiftada

Jiiftadu waxay leedahay sida gabayga beyd ka kooban laba shadar oo aan saas u kala dhaadheerayn.

Shadar waliba wuxuu ka samaysanyahay marka laysku daro alamba iyo shaqallada 9 - 10 illa 11.

Kama yaraan karo kamana badan karo intaas, hadduu yahay beyd qumman oo jiifta ah.

Isku darba alambata iyo shaqallada dhaadheer ee beydka wuxuu ku imaanaayaa 18, 19, 20, 21.

Shadarka hore (I)			Shadarka dambe (II)			I & II
1	9	+	9	=		= 18
2	9 	+	10	=		= 19
3	9 	+	11	=		= 20
4	10	+	10	=		= 20
5	10 	+	11	=		= 21

T u s a a l e:

1. $\boxed{8+1=9}$ Kuf-ri-ga i ma-hoob-bi-yey i-din-kaa mi-ta-miyyoo $\boxed{7+2=9}$
1 2 3 4 5 6 7 8 1 2 3 4 5 6 7
2. $\boxed{6+3=9}$ Nin sha-baab a-haan-tii sha-ree-ca-da bar-taan a-hay $\boxed{8+2=10}$
1 2 3 4 5 6 1 2 3 4 5 6 7 8

° Dhiska = Miisaanka oo ka maqan Rugta sh. dheerayaasha.

- t. $\boxed{7+3=10}$ Aa-khi-ro hal-kay joog-san huur baw dam-bee-ya e $\boxed{6+3=9}$
 1 2 3 4 5 6 7 1 2 3 4 5 6 (Cali Xuseen)
- 3.b. $\boxed{7+2=9}$ A-di-ga-na a-doo-gaa u-ba-taa-luu la-haan ji-ray $\boxed{8+3=11}$
 1 2 3 4 5 6 7 1 2 3 4 5 6 7 8 (Sayid)
- t. $\boxed{10+1=11}$ Ma-la-ha hal-law-ga ja-ban-na-ma
 1 2 3 4 5 6 7 8 9 10
 ho-dan baa la moo-da-ye $\boxed{7+2=9}$
 1 2 3 4 5 6 7 (Cali Xuseen)
4. $\boxed{8+2=10}$ Nin ra'-yi-gu had-duu sheel-mo shi-shuu fii-ri-yaan a-hay $\boxed{7+3=10}$
 1 2 3 4 5 6 7 8 1 2 3 4 5 6 7 (Keenadiid)
- 5.b. $\boxed{7+4=11}$ Had-dii aa-dan dam-baa-dayn aah-hir ma-rag ah soo taag $\boxed{7-3=4}$
 1 2 3 4 5 6 7 1 2 3 4 5 6 7 (Sayid)
- 5.t. $\boxed{6+5=11}$ Aw-ya-low ma diid-deen ja-haad-ka maw da-reer-taan $\boxed{7+4=11}$
 1 2 3 4 5 6 1 2 3 4 5 6 7 (Sayid)

- - - o o o - - -

Cabdalla maan qaboobiyo

Xirsi maakib laawow

Maqashiya uunkaba

miyir inuu ku soo yalo

Kid waxow tiraahdaan

nimanke mooradii furay!

Mawaacidada Diinkii

ma wax laysku maana?

Kucaarada keenihi

ma wax lagu bannaanaa

Luxudhii ardeebaa

ma lays noogadeexaa?

Mufada cadsabeed

haw adigaanaysaan?

Gaal nin u nidiidimay

maqaan naara inuu tegi

Kutubta <u>a</u> u maragee	ma wax lagu turmaabaa
Mushrik inaad jooclaataan	amrad mudan in sheegtaan
Haddaydaan mujrim ahayn	masalo inaad u haysaan
Kaaslo waabyadiinnaa	moel daran idiin dhi'ay!
Kuuti'a waanadiisii	idinkaa ka maartoo
Iacbuudhii Rabbi ahaa	idinkaaaba moortoo
Kanbarkiiyo qiyaamaha	idinkaa munkirayoo
Kuqfiradii Ilaahay	idinkaa ka maarmoo
Kacranhii firdawnaad	idinkaa murra'atoo
Kunniinimada laabtaa	idinkaa nanta ayoo
Kufri'a i naboobbiiyey	idinkow miidinow
Kakaankii shareecada	idinkaa mitaniyoo
Muslinkiiyo qusuusida	idinkaa makalayoo
Maalkii agoomaad	idinkaa malhabayoo
Lasrafiyo quraankii	idinkaa maljadayoo
Waxse mawtigiin galay	ama malag idiin yimid
Karkaad Maxamedkiinii	malcuun uri ka raacdaan!
Kariyoo macneeyaye	mid kaleete wuxuu yahay
Waxaan maqlay Firingjigu	innu miiri idin qoray!
Waxaan maqlay maalkii	innu idinka meersaday!
Waxaan maqlay ooryaha	mid tan inaad ka weydeen
Waxaan maqlay madaxdiira	in miidiin laga dhigay
Aan miis yar mooyee	maray ooel la siinayn!
Waxaan maqlay maahyaha	maraciin innu ba'ay!!

Nin shugriga Ilaah iyo	hahaadada qiraan ahay
Nin shuruudda taxwiidku	ku shisheeyso baan ahay
Nimaan sharacu suu yiri	shakay ay nin baan ahay
Nin chafeecadii Nebiga	shinsaanaaya baan ahay
Nin shabaad ahsantii	shareecada bartaan ahay
Nin shuuriyo ancaam iyo	shucarada dhiqtaa ahay
Nin shirrabay tafaasurta	shuruuxdana oo baan ahay
Wixii shulubio ceeb ah	nin ka sheexayaan ahay
Nimaan shawr ajnebi iyo	shilin jiidan baan ahay
Nin ra'yigu haduu sheelmo	shishuu fiiriyaan ahay
Nin sham haadka taariikhda	ka sheekayn karaan ahay
Nin shoofaarta abaygana	shaacirkeed ah baan ahay
Nin shiddiyo khilaaf iyo	sharka diidaan baan ahay
Nimaan dhuush Ilaah gelinin	kana shaafiyaan ahay
Nin anaaniyada shaacday	ka shibqaatay baan ahay
Nimaan sharafta Soomaali	shayna dhaafsan baan ahay
Nimaan kala shirshiriddeeda	ka shaqaynnin baan ahay
Nimaan shuqulka gaalada	shafaahaynnin baan ahay
Nin sharmaarka iyo Yuusuf	la shalaabadaan ahay
Siyaalaha an soo sheegay	nin shiikhow ah baan ahay

(Yuusuf Cismaan Keenadii)

Muslinkii ~~haga~~ habawyoo

Halkii Nabigu maray iyo

Iblays baa habawshoo

Haddaan laga hortegin

Qiyaamaha wax lagu ~~hagi~~ hoogi

Malaha hallawga jahannama

Dambigay hadiidayso

Wacdi baa ku soo hooray

Jidkii lagu hanuunaayey

Aakhiro halkay joogsan

Malaha hallawga jahannama

Sida hadiyad loo siiyey

laqmigay hadiideyso

Sida geel harraad qaba

Xaaraanta lagu hogay

Waa taa huq weyn reebtay

Malaha hallawga jahannama

Nafta waxaw horseedeen

Hanti waxaad ka dhigateen

Quruumihii dhulku hamsiiyey

diintii hallawdaye

hilinkii kaa weecdee

meel xun u hoggaanshaye

maanta beladaan u hawl galay

hoosaasintiisa e

hodon baa la moodaye

Rabbi uma hibeeynine

aan wax u hambaynine

hareer bay ka dhaaftaye

huur baw dambeeya e

hodon baa la moodaye

beentaa hagaagta la'

xasadkaa habeen galay

khamrigaa la heensaday

aan meherku kuu qaban

ee lagu bingoodaye

~~Hodon~~ baa la moodaye

waa meel habaarane

dadku waa ku heermiye

ee naga horreen jirey

Kuwii Nabigu hiiifeeyey

Haddaad dabada haysaan

Hataqay ka duuleen

Malaha hallowga jahannama

ee Nuux ka soo haray

wixii lagu hallaagaye

idinkaa u halisa e

hodon baa la moodaye

(Cali Xuseen Xersi)

G U U R O W

Guurowga waxaa aad looga yaqaanaa gobolka Banaadir ilaa Gal-gaduud. Maansada kuwa ugu muhimsan ayuu ka mid yahay, mawjadida uu ka hadlaayo waa kuwa gabaygoo kale. Murti, xigmad iyo maad-bana kuma yara.

Dhiska Beydka Guurowga

Guurowga laba nooc ayuu u kala baxaa, mid gabayga u eg iyo mid ka duwan.

1. Midka gabaygu ka duwan beydkiisu wuxuu ka koovan yahay 9, ~~ala~~ 11 ama 10, marka laysku daro alamada iyo shaqal dheerayaasha

Tusaale:

Alan	+ Sh.Dh.	= Wadar	
6	+	3 = 9	→ In-ya lay-gu daa-taa
6	+	4 = 10	→ Da-bool-kee-da ii saar
7	+	2 = 9	→ In-ya da-rar la maa-laa
7	+	3 = 10	→ Si-dii neef dar-weyt a-he
7	+	4 = 11	→ Ee-baa noo ha-ki-yaa-ye
8	+	1 = 9	→ Dif-se reer-ka ku-ma ta-rin
8	+	2 = 10	→ Dood ca-weys i-su-gu yi-mid
8	+	3 = 11	→ Nin-kii u dhuun-to dheef shir-ka

alan	+	Sh.Dh.	=	Wadar	
9	+	1	=	10	→ kan dam-ba-na wax ku-ma di-lin
9	+	1	=	10	→ I-gaar wa-ran daf la-gu yi-ri
9	+	2	=	11	→ Hi-rin-ta naa-goo ha-wa waa-lan

Suurow nooca qabawga u okeen.

Waddex walxaatoo ha ku taal

Waxay hammaayan ma hoobaa

Ebbase noo haki haaya

Hirka maayoo hawa waalan

Waxaw hammaayan ma hoobaa

Ebbase noo haki haaya

Hayinka geel oo hawa waalan

Waxaw hammaayan ma hoobaa

Ebbaa noo haki haaya

Hirinta naagoo hawa waalan

Waxay hammaayan ma hoobaa

Eestimaso noo haki hoysa

Ninkii u dhuunti dheef shirka

Dhabar ka toojashow dhow

- - - - o O o - - - -

Inay daa'in tuugnaa daw raaya noo da'ay

Inay darar la maalaa dood caweys isugu nimid

Inay laysku daataa igaar waran daf lagu yiri

Iyadoo daabab gurashiyo dalfiiq sahasho lagu jiro

Oo dirir kale la geli rabo dableeyaa dig soo tiri

Dabafurane baabuuray dusha nooga tuureen

Asay dibirka ceelbuur dahar nooga oodeen

Digsi daan ka jabanaa diir nala ku siiyaa

Haddaan diidi maagana yaan lagaaga darinaa

laugu daba sameeyaa dagaal an kuma jirin

Kan dambana wax kuma dilin duuliyowna ma ahayn

Dambina waaga inya galay ~~daw~~ dowladi iguma soo xirin

Dooyadaasna waa iri difse reerka kuma tarin

Duqito duub wax kama cunin danaanana qof kama helin

Duudishana markow yimid dambigeenni yuu qorey

Wuxuu yiri ma deysamaane daboolkooda ii saar

Reer i soo dawweeyoo iiga darayna ma aqaan

Dayacaana lagu baxay daa'imaanse leenahay

Sidii neef darweyt ahe daw xaraar ah laga shubey
 Oo duugduug ku fuli tegey duhurkoon qaboobeyn
 inaya daaqad beelnay daymo naga dambaysaa
 kuna dayrin maynee daruufaa na wada maray
 Danta nooga aal keniyaan adduunyada daymoonee
 Sidii walax u diimoon..... (Cabdulle Raage Daraawiish)

Guurowga nooca gabayga u eg.

Guurowga gabayga u eg beydiisa wuxuu u kala baxaa laba sha-
 dar. Beydkoo idilna wuxuu noqdaa, kolka laysku daro almada iyo
 dhaqal dheerayaasha 20 ama 21, sida gabayga, Beydad aad u yar baa
 tiradaas wax yar dhaafa (22,23). Inkastoo guud aanan uu guurowgu
 aad ugu dhwyahay gabayga haddana xagga miisaanka labada shadar
 ee guurowga way ka duwan yihiin kuwa gabayga. Haddaan ka soo qaad-
 no dhadarka dambe ma aha sida gabayga oo ay shardi u tahay in ay
 wadarta alamada iyo shaqal dheerayaashu ahaadaan⁸. Guurowgu wuu
 ka badan karaa intaas.

Tusaale:

1. Ta-ban-taab-yo waa kaan rab-nee ta-bar han-noo shee-gan $14+6=20$
2. Sal dha-baan dhab naag loo-ga te-gey sii-na dha-li-may-so $15+5=20$

3. Mar-si bun ah ma-qaab kuu yi-mid ma-ra-sha-uu-sa waa-ye I6+4=20
4. I-laa-how mur-raad-kaa-da sa-hal raa-ji ma-da-xaa-ga I5+6=2I
5. Sii-na ma-la-ha sac yeer yee-ra i-yo saw-ya e-ra-ley ah I6+5=2I
6. Way-sa aan la way-heen nin-kii we-bi ag- joo-gaa leh I4+7=2I

Inta caadiga ahayn:

1. I-laa-how ma-dax ji-baal meel xun yaal a-dan ku meer mee-rin I6+7=23
2. Haw-raar-ta maan-sa-da had-dii aan hay-bad-da u saa-ro I5+7=22
3. Hor-mood wa-xaad a-haa-ta-ba mar-bay da-ni ku -heer-taa-ye I6+6=22

+ + - o O o - - - -

1. Marsi bun ah maqaab kuu yimid marashadiisa waaye
- Mawtadana waa mahaddiisa magen allaydiisa
- Ilaahow muraadkaada sahal raaji madaxaaga
- Maantana masiibaa jirtee waqay ku soo maagin
- Ilaahow madax jibaal meel xun yaal adan ku meer meerin
- Murreydii manay kaa maqneed minanka keen maanta

- - - - o O o - - - -

2. Kasi maa nimaan loo kadbeyn oon kutuba qaadin
- Kaligaa cawey waa qandhadaan kaadka naga joogta

Kasdarro waa kal dheertoo jabtoo	kabow qabeen waaye
Ilaahaw naga koryeel oon qalbiga	nagala haydeysan

- - - - o 0 o - - - -

3. Tuxbax go'ay tiraa lagu naqaa	geberna sii tuugmo
Tayeeg meel ku yaal waa tilmaan	tubuna waa heelad
Taban taabyo waa kaan rabnee	tabar hannoo sheegan
Inaan tuurka kaa bidin korkaa	lagu tartiibshaa he
Oon tubaalu kaa marin indhahaa	lagu tubqaadshaa he
Gabaryahay labar hanoo sheeganin	

- - - - o 0 o - - - -

4. War layiri wajer loo lahayn	waragga roobaa leh
Wausa aan la wexheen ninkii	webi ag joogaa leh
Wixii waaxidkeed kugu wadeeca	lagu waajibaa
Siina ma leh sac yeer yeera iyo	sawjad eraley ah
Sal dhabaan dhab naag tegey	siina dhalimayso
Saaxiibkaa salaan kuugu yimid	lama sulma ~~y~~ yeeyo
Soohin riixo salaax beer aha	soor ku dheli diidday

- - - - o 0 o - - - -

Hoodiyo nasiibkay haddii aan	ugu tusaaleeyo
Hawraarta maansada haddii aan	haybadda u saaro
Ciddaan haa'el iyo soo taray hadiyo	hadday ii loogto
Hufnaanta iyo kartida layga rabay	hubanti soo ma aha e
Hiddahaada waa lagu hirtaa	dhaqanka hooyoodi
Haloodkaan la marin waa inay	dhir u hareereeyde
Holacaan la demin dhararka waa	inuu mulaaqaaye
Jeerow qabuuraha holmiyaal	layska dhaafsiiyo
Ama hogol daruur curatayoo	daadku hiligleeyo
Ama ay dabayshu hakidaad	daadku hiligleeyo
In au halis soo yeelan tahay	hayi nabaad guur leh
Hubaal iyo yaqiin nimaamu ahayn	soo ma hadalqaade
Nin soo habaar mudaystow marbaad	hilin jabydaa ye
Waxaad kor u soo haydaba marbaad	huuto noqotaaye
Hujuumka iyo booddada marbaad	halash ka daashaaye
Hoobaanta mirahaa marbaa	~~nacab ku heesaa~~ yehuf ka daa'dshaaye
Washaad wal waashaba marbaa	nacab ku heesaa ye
Haweentaada duulkale marbaa	hiba u yeeshaa he
Higsiga adduunyada danaad	uga hareydaaye
Huruwa waa dhulkaadii intaad	hagar u daahaydo
Ama laba hechiis u nocotay iyo	hormar diideydo
Inaan kugu dhiyaayo bulshada	waa haboon tahay e
Waa iyo dhiyaayo bulshada	hormar diideydo

M A S A F O

Labo jaad oo masafa ah ayaa jiraan: mid loogo dhaqmo Wagooyi, Bari iyo Mudug, midna laga yaqaan xeebaha Banaadir ilaa Galgaduud.

1. Masafada Wagooyi meelna ugu duwana Jiiftada, xagga macaanka, luuqda, miisaanka, Meesha keliya oo in yar ku kala duwan yihiin waqurtida.

Masafada waxaa si gaar ahaaneed uga hadashaa waqdi diinta. Waxaana tiriga niman diinta aqoon dheer u leh, ayagaana u bixiyey magaca Masafa.

Maxay wadaaddadu magacii hore oo jiifto uga tageen oo midkaan danbe u curiyeen haddii ayamba waxba ku kala duwanayn?

Jiifto waxay u harsheen magac fan ku saabsan oon diinta u galmin, sidaas awgood bayna magaca masafa ula baxeen. Masafada noocan ah waxaa ku caan ah Sayid Max'ed Cabdulle Xasan, loomana baahna innaan halkaan ku falanqeeyno habka ay ku dhacantahay, waayo jiiftada aynu ka soo hadalalay baa kaaya filan, maadaama waxba ku kala duwanayn.

2. Masafada Banaadir iyo Galgaduud way ka duwantahay masafada aan ka soo hadalnay xagga miisaanka iyo luuqada. Waxayse isaga egiyihiin xagga mawduuca oo wada ah waqdi iyo xigmad.

Masafadan danbe waxaa looga hadlooyay caalimkii waddaniga ahaa

ee Ghoeldh Gabyow, kaasoo masafadiisu wacdi diineed iyo guubaab
isugu dhafneed, si uu dadka rarna ugu hamuuniyo jidka Eebbe narna
u tusiyo foolxumada gumaasiya.

Beydku wuxuu badanaaba ku dhisan yahay 11 ama 10 alan. Waxaana
mararka gaarkood beydku ka koobnaan karaa 9 ama 12 alan. Haddiise
laysku daro tirada shaqal dhoerayaasha iyo tan alamada waxay noqdaan:
14 iyo 15. Marar dhif ahna waxay noqon karaan 13 ama 16.

Tusaale: (Masafadii Gabyow).

Jididka towba intaan la soo jerin	11+3= 14
Jahiimman hoor jaanadaan u jeediyaa	11+5= 16
Jijilcanaa jinahiina tacabdhaha bal	11+3= 14
Jismiganaar ma u joogsadaan nee?	10+4= 14

- - - - o O o - - - -

Ninkii dharaartay dhabtii fiidka loo dhigay	16
Dhallaamadiisa asey u dhaansheen	15
Hadduu dhawaaqana dhib kaa badan	13
Waxaa dhahdaa ubbadeyda hoor dhuuq	15

- - - - o O o - - - -

Raran ninkii ku roogsadaa rabbeeyee	16
Ninkii la ruubiyey raaxa maw fileysiin	16

- - - - o O o - - - -

Waxaa dhalaysa asii dhallaamaa	15
Waxaad dhamayso asii dhacaamaa	15
Waxaad dhahayso asii dhawaaqyaa	15
Dhulkaad marayso asii dhabbaa	13
Intaan lagu dhalineey dhignaayee	14
Looxa la dhowrayey ~~daha~~ dhax yiileen	13

- - - - o O o - - - -

Dhallinyaraay ma dhagaysahaysin	13
Dhallinyaraay ma la dhuumahaa yaa	14
Dhiddigow dhaamid ka dhowrsan maayee	15
Yaanan dhashiini la saarin dhiiftaar	14
Yaanan dhashiina dhurwayga loo dhigin	15

- - - - o O o - - - -

Dalaaqyadeeda haddaan dureeriyay	15
Dig soo yiri yaa dagab dusha lay dhigay	16
Dukadayaa waqtigii aan dey jiray	15
Dararyayaa sacii maanta loo dabay	15
Dambeyd yadiisa ma irmaana lay yiray	15

- - - - o O o - - - -

W I G L O (Wilgo)

Waa maanso aad u da'wayn oo habkeeda iyo murtideedu aanay marna qiima iyo qaaya dhicin ~~q~~arniyaalkii badnaa oo ay ~~ji~~ jidka soo haysay.

Waa maansada samaysay isbedelka ugu ballaaran suugaanta Soomaaliyeed, kuna raanikarta inay murti aad u fara badan qiime aan la hilmaami karin lihina ka soo farcantay.

Xeeldheerayaasha suugaanta Soomaaliyeed rag ka tirsan sida Xaaji Baal-Baal iyo Sheekh Jaamac waxay qabaan inay wigladu ka timid xagga dhulka Waamo, oo looga yaqaani "Jiib", badanaabana naagaha ayaa lagu xood-xootaa. Markii dambana daraawiishi keentay xarumeheedii halkaasoo loo bedelay hees tillaabo (Dhaanto).

Codka iyo uheedada uun baa isbedeleen mooyee dhiska beydka dnaantadu waxba kama duwanayn kii Wiglada..

Daraaxiishtu waxay qaadi jirtay dhaantada marka ay duulaanka tahay iyo marka ay soo ~~gali~~ guuleysato, waxayna ahayd hees codkeedu ku imaanayo saanqaadka tillabada, kolkee dambana waxay isu rogtay hees cayaareed jaan iyo sacab qaadata.

Dhaantadii waxaa misana ka soo farcamay hees cayaareed la yiraahdo Hurbo oo ragga iyo dumarku goobta wada galaan.

Isirkii Wiglo meeshaas kuma ekaen ee Hurbo waxay sii dhashay

hees cayaareed kale oo la magac baxday Hirwo.

Nin la oranjiray Cabdi Shineema ayaa misana wuxuu soo saaray waxa la yiraahdo Balwo(1941) isagoo raacaya Miisaankii heesihii ka soo jeeday Wilgada.

Waxaa aad la yaab u leh in isbedelkaas qota ~~dh~~Heer lihi dhacay mudadii qiyaas u dhaxaysay 1910 ilaa 1941.

Sanadku markuu ahaa 1946 ayaa dhalinyaro reer Booraama ahi miisaankii balwada iyo wixii dhaantada hees ka soo farcamay haleeshiiyeen codka Hellada. Waa markii ugu horaysay oo hees Soomaali ah la raacsiiyo wax lagu tilmaami karo muusik oo ka baxsan sacab, jaan iyo durbaan, ninkii ugu horeeyayoo hawshaas isku daya kuna guulaystay wuxuu ahaa Hindi.

Hellada waxaa faafiyay oo in yar ku soo banbixiyay koox dhalinyara ah oo la oranjiray " Kabacad " waayo waxay xiran jireen saraawiil iyo kabo cad cad, Ingiriiska bayna u shaqayn jireen (cunto kariyaal, wadayaal i.w.m.)

Hellada aad baa loo xiisaynayay burbana way soo if baxday; mudada badan bayna ahayd heesta ugu wanaagsan oo magaalada lagu timo waxayna soo gaartay ilaa 1965. Kadibna heesa kale ayaa ka soo faracmay, waana kuwa aynu maanta ~~magaala~~ maqallaa, kuna raaxaysano.

Miisaanka Wiglada

Beydka Wigladu laba beyd bay isu raacaan ha ahaado xag-

ga codka ama xagga micnaha taasina waa astaan sugan oo Wiglada u gaar ah.

1. Beydka hore wuxuu ka koobanyahay 10 alan iyo 5 shaqal dheere.
2. Beydka labaad wuxuu leeyahay 9 alan iyo 3 shaqal dheere.

Waxyaabaha kale oo la yaabka lihi waa in:

b. Shaqal dheerayaasha beydka hore laga helo meela go'an oo kala ah: alanta 2aad, 5aad, 7aad iyo 10aad.

t. Beydka labaad laga kala helo alanta: 2aad, 5aad iyo 7aad.

Miisaanka Wiglada

B e y d k a h o r e			
alan	shaqal dheer	Wadar	rugta shaqal dheer.
10	4	14	2aad, 5aad, 7aad, 10aad
B e y d k a l a b a a d			
9	3	12	2aad, 5aad, 7aad

T u s a a l e:

- I. $\begin{matrix} \circ & & \circ & & \circ \\ \text{Ka} - \text{kaa} - \text{wi} & \text{Min} - \text{ley} & \text{Min} - \text{weyn} & \text{hu} - \text{ru} - \text{day} & (10+4=14) \\ 1 & 2 & 3 & 4 & 5 & 6 & 7 & 8 & 9 & 10 \end{matrix}$
- $\begin{matrix} \circ & & \circ \\ \text{Ka} - \text{koy} & \text{Min} - \text{ku} - \text{meel} & \text{ma} - \text{lee} - \text{ya} - \text{hay} & (9+3=12) \\ 1 & 2 & 3 & 4 & 5 & 6 & 7 & 8 & 9 \end{matrix}$

II. Had - dii^o ra - gu^o duu - lo^o raar - na - ga - lee^o (10+4=14)
 1 2 3 4 5 6 7 8 9 10

Da - gaal^o ra - na - taan - nu^o lee^o - na - hay (9+3=12)
 1 2 3 4 5 6 7 8 9

Beydadka soo socdaa waa kuwo a) naag la qabo iyo nin u soo haasaa-
 we doonta is dhaarsanayaan murti maldahan.

a- Ninkii libaa xafada muskeeda soo istaagay:

1. Caweyn caweyn caweyn bullo.
2. Ciddiinta caweyn caweyn.

b- Waxay ugu warceliway:

1. Dhabeeti libaaxle dhiin gorayow
2. ninkii dhaqay dhayda loo baadi

c- Saygii oo aad la filayn warka ka dhaarsanayay wuxuu ugu

warceliway labadii hasaawaayey:

1. Belaayo rag baan u baali daayo
2. Birtay nimay gaadhey baan maleh.

- - o o o - -

Lixaad jeeni dhiin darayoo

Dhaanto

Bad weyn ka jibaadayaan nahay

- - o o o - -

Qayaadsame wiilashii qoranyoo

Dhaanto

Qoyaayo ka dhowr bay baan maleh

- - o o o - -

Laanso la Heeso

Qaybta labaad ee ah qaansada la heeso, wadanka aad bay ugu badantahay wax la koobi karana ee aha, waxaana badanaaba dhacda inay dhowr gobol isla yaqaan hal hees, hase ahaatee aanay isku si u gaadin. Marka waxaa fiib ah si loogu helo qawaaniin go'an. Si-
gaas aygeed way adaptatay in heesoo dhan la wada siiyo sharci go'an oo u caan ah, sida qabawga iyo qooraanka oon qawaaniintoodu isbe-
delin gobol kastaba ha loogu curiyee.

Maatan waxaa tusaale ahaan u soo gaadanaynaa heesa badanaaba la wada yaqaan, waxaana dhici karta inay jiraan heesa kale oo aad u qaaya wayn oonaan halkaan ku xusin. Sababtuna waxay noqonkartaa inay yihiin wax degmo ama gobol kaliya u gaar ah.

Bidaynu horay u soo sheegnay heesuhu waxay u kala baxaan laba qay-
bood oo kala ah;

- | | | | | | |
|-----------------|---|---------------|-------------------|---|---------------|
| 1. Hees Howleed | { | Hees Xoolleed | 2. Hees Ciyaareed | { | Inta hees |
| | | " Mooye | | | ciyaara raac- |
| | | " Caanood | | | da oo idil |
| | | " Kebdeed | | | |
| | | " Caruureed | | | |

Hees Xoolaad

Hees Geel.

Kolka xoolaha la ilaali ayo ama la waraabinayo waa loo heesaa.

Xayawaan kasta oo la dhqdaa hees gaar ah buu leeyhay, waxaana ka mid ah: Hees Geeleed, hees lo'aad, hees aryeed iyo hees daneereed. Inkastoo heesahaani kala duwan yihiin haddana wada baariddoodu ma sahlana waxaanse tusaale ahaan uga soo gaadanaynaa hesta jella, waayo taas ayaa ugu caansan hees xoolaadka. Soomaalidu waxay aaminsantahay inay xooluhi ku raaxaystaan heesaha.

Sidaas darteed neefka waa loo heesaa si aanu u cidloonaana ugu daalin socodka dheer, si uu u noqdo hebed caruurtu xigato.

Geelu markuu rakaadanayo haddii looh heeso si wanaagsan buu u biya qaataa, haddii kalase inta bishimaha qoysto ayuu iska dhaqaaqaa isagoo weli kelya dabacsan.

Sidoo kale awrka markii la rarayo haddii aan loo salsalin wuu kic kicid, ruuq-ruqaansi iyo siqid badanyahay culayska badana wuu ka margaagaa, haddiise nin cod wanaagsan u salsalayo cabasho iyo siqid midna lagalama kulmee wuu iska raamsadaa ilaa howshu ka dhaamanayso oo ho' laga oranayo.

Arrintaan haddii si cilmiya loo baaray ma noqon micne la'aan iyo iska dheh ee waa wax raad qota dheer leh.

Culima Maraykan ah baa ka gun gaartay inay xooluhu ku raaxays-
taan muusikada iyo codadka mac macaan, ka dib markii ay sameeyeen
tijaabooyin badan.

Miisaanka heesta geela

Inkastoo gobol walba u qaado heesaha si gooni ah, hadana heesta
geela aad baa laysaga eg yahay. Gobolla aad u yar mooyee.
Waddanka intiisa kale oo idil si un baa loo wada qaadaa heesta geela.

Dhiska Beydka.

Beydka heesta geliu aad buu u gaaban yahay, wuxuuna ka kooban
yahay 6 ama 7 alan oo ku dhamaystiran shaqal dheerayaasha.

B. Marka beydka uu yahay lixe saddex siyood un buu noqon karaa:

- 1) In beydku ka koobnaado 5 alan iyo 1 shaqal dheere.
- 2) Ama uu ka koobnaado 6 alan keliya oon shaqal dheeri biirinaynin.
- 3) 4 alan iyo 2 shaqal dheere mid leh (waana dhif).

T. Markase beydku uu yahay todobaale(7), seddax siyood un buu no-
qon karaa:

- 1) 4 alan iyo 3 shaqal dheere.

2) 5 alan iyo 2 shaqal dheere.

3) 6 alan iyo 1 shaqal dheere.

T u s a a l e:

Waa tan oo ti - mid
1 2 3 4 5

$$5 + 2 = 7$$

Waa na teen - nii
1 2 3 4

$$4 + 3 = 7$$

Waa na tool - moon
1 2 3 4

$$4 + 3 = 7$$

Waa na tu - ban - ta - hay
1 2 3 4 5 6

$$6 + 1 = 7$$

Waad qa - boo - bi - ye
1 2 3 4 5

$$5 + 2 = 7$$

Qun - yar soo so - co
1 2 3 4 5

$$5 + 1 = 6$$

Ha - dhaa - gaa - ga
1 2 3 4

$$4 + 2 = 6$$

Heb - la go - dol i - yo
1 2 3 4 5 6

$$6 + 0 = 6$$

Rugta shaqal dheerayaasha:

Heesta gella waxay leedahay shaqal dheere oo laga helo meela

u go'an, laba kooxood bayna u kala baxaan:

B. Qaybta lexleyda ah labadaan nooc bay noqon karaan:

1) Haddii beydku ka kooban yahay 5 alan & 1 shaqal dheere, rugta shaqal dheeraha waxay noqon kartaa alanta(3aad) ama (1aad) ama (5aad).

2) Beydka ka kooban 4 alan & 2 shaqal dheere, waxay rugta shaqal dheeruhu noqon kartaa alanta(2aad,3aad) ama (1aad,2aad).

T u s a a l e:

Shu - ba shu - ba - ney^o
1 2 3 4 5

$$5 + 1 = (R. 5^{\circ})$$

Sha - ley^o - to had - daa^o
1 2 3 4 5

$$5 + 2 = (R. 2^{\circ}, 5^{\circ})$$

Wa - xa ku - gu shu - bay
1 2 3 4 5 6

$$6$$

Yaa kaa shu - bay

$$4 + 2 = (R. 1^{\circ}, 2^{\circ})$$

Ha - dhaa^o - gaa^o - ga
1 2 3 4

$$4 + 2 = (R. 2^{\circ}, 3^{\circ})$$

Heb - la go - dol i - yo
1 2 3 4 5 6

$$6$$

Ha - dhuub^o la - gu te - bey
1 2 3 4 5 6

$$6 + 1$$

Wa - ri - hii^o ka - ray
1 2 3 4 5

$$5 + 1 = (R. 3^{\circ})$$

Waa^o ku - wa fi - day
1 2 3 4 5

$$5 + 1 = (R. 1^{\circ})$$

T. Qaybta todobaadlayda ahaa 3 nooc ayey noqon kartaa:

1. Beydka leh 4 alan & 3 shaqal dheere, rugta shaqal dheera-yaasha waxay noqotaa alanta (1°, 3°, 4°).

T u s a a l e:

Waa tan oo ti - mid	5 + 2
1 2 3 4 5	
Waa na teen - nii	4 + 3 = (R. 1°, 3°, 4°)
1 2 3 4	
Waa na tool - moon	4 + 3 = (R. 1°, 3°, 4°)
1 2 3 4	
Waa na tu - ban - ta - hay	6 + 1

2. Beydka leh 5 alan & 2 shaqal dheere, rugta shaqal dheera-yaasha waxay noqotaa alanta (1°, 3°).

T u s a a l e:

Caa - ta saar - tay e	5 + 1
1 2 3 4 5	
Caa - la - miin - ki - go	5 + 2 = (R. 1°, 3°)
1 2 3 4 5	
Caa - dil - kow sa - hal	5 + 2 = (R. 1°, 3°)
1 2 3 4 5	

3. Beydka leh 6 alan & 1 shaqal dheere, rugta shaqal dheera-yaasha waxay noqotaa alanta (1°) ama (2aad).

T u s a a l e :

Had - day tu - ban - ta - hay
1 2 3 4 5 6

$$6 + 1 = (2^{\circ})$$

Ay tol lee - da - hay
1 2 3 4 5

$$5 + 2$$

Loe - ma ka → la ta - go
1 2 3 4 5 6

$$6 + 1 = (R. 1^{\circ})$$

Kiisanka Baydka " Heesta Geela "

Tirada alanta	Tirada Sh.Dh.	Wadar	Rugta Sh. Dhoorayaasha
4	2	6	alanta (2°, 3°) ana (1°, 2°)
4	3	7	" (1°, 3°, 4°)
5	1	6	" (39) ana (1°) ana (59)
5	2	7	" (1°, 3°)
6	0	6	" - - - - -
5	1	7	" (1°) ana (2°)

1. Geela geel fulay

Garimaayoo

Ha ka daba fulo

2. Maadaxeyraane

Maadax na ootahay

In rag sara kacay

Oo sibraar goyey

Ooo sen'e cayiley

- - - - o O o - - - -

3. Qurdub taabacu

Qurdub meelleba

Waa qubnaanjiirey

- - - - o O o - - - -

4. Hadhaagaaga

Hebla godol iyo

Hadhuub lagu tebey

- - - - o O o - - - -

5. Xarbigaayana

Anuunbaw xidhan

Xaajadaatana

Xaaji way la'aan

6. Reydableybaa

Reero yaalliin

Roobna ka onkodey

- - - - o O o - - - -

7. Uguufada roob

Ee# agteenna ah

Idiin bal addoros

- - - - o O o - - - -

8. Sabaan adhi jabay

Sacna weyl gubey

Anoo suubiyo

Seento maalaa

Seexan waayey

Sagaaraystiyo

Sabool adhiyare

Sidaw noolyiin

- - - - o O o - - - -

9. Haddaan kura'du

Kaalin ka iman

Kor wax baa jira

- - - - o O o - - - -

10. Horaad kaagiyo

Horaadka hablaha

wax la huurshaba

Hareer ka hillaac

- - - - o O o - - - -

11. Geeri naagood

Guud la firay iyo

Guursi laga qaad

Geeridaydana

Guryo ba'ay iyo

Gablan laga qaad

- - - - o O o - - - -

12. Waa qaboobi ye

Qunyar soo soco

- - - - o O o - - - -

13. Weyda walasey

Weyda ku asoo

Oo ha ku umulin

- - - - o O o - - - -

14. Sool baad tegiyo

Soddon bay qadi

- - - - o O o - - - -

15. Intay gabannadu

Gaamuraayaan

Amba waw shubi

- - - - o O o - - - -

16. Xarbi xagallada

Wiil xanaanshiyo

Xoojiyaaska leh

- - - - o O o - - - -

17. Geelu gobabtii

Gaaniyo irmaan

Goloof iyo rimay

Haysku guda jiro

- - - - o O o - - - -

18. Jiidh iyo caddiin

Joome iyo kuras

19. Ragga geela leh

Ragga daba yaal

Ayaan daba naal

- - - - o O o - - - -

20. Waa tan oo timid

Waa na teenii

Waa na toolmoon

Waa na tubantahay

- - - - o O o - - - -

21. Cagta saaray e

Caalaminkayo

Caadilkow sahal

- - - - o O o - - - -

22. Hadday tubantahay

Ay tol leedahay

Loo ma kala tago

- - - - o O o - - - -

H E E S M O O Y E

Hees Mooye waxay gaar u tahay dumarka, waxaana la qaadaa marka badarka la tumayo. Heesku wuxuu la socdaa beydkiisuna ku go'aa(rhym) kolka kashû ku dhacayso mooyaha salkiisa. Justaas ayaa muusika u ah.

Miisaanka Beydka Hees Mooye

Beydka hees mooyuhu wuxuu ku dhisan yahay cod muusika leh oo aad u cad. Qaunuunkiisuna, aad uu u qayaasan yahay. Inkastoo gobol walba uu leeyahay si gaar ahina uu u qaado heesaha, haddana hees mooyaha waa isku wada mid geyigeeni oo idil xagga miisaanka, in aad u yar mooyee.

Beydkiisu wuxuu ka koobanyahay 8 ama 9 alan iyo shaqal dheerayaal lagu dhamaystiro.

Alamadu waxay noqon karaan 6 ama 7 oo keli ah. Haddii beydku uu yahay 6 alanle waxaa raaci karaan 2 ama 3 shaqal dheer.

Haddiise uu yahay 7 alanle, 2 shaqal dheere un baa raaci karta.

Rugta shaqal dheerayaashu way caddahay oo isma rog-rogto.

Waxaa mar walba shardi ah in shaqal dheerayaasha laga helo alanta

3aad iyo tan 6aad. Haddiise beydku uu yeesho 3 shaqal dheere

(waa marka beydku ka kooban yahay 6 alan iyo 3 shaqal dheere),

midkaan seddaxaad, oo beydka mar mar dhif laga helo, rugtiisu waa alanta laad, Waxaa xaaran ah in shaqal dheer laga helo almada 2aad, 4aad, 5aad iyo 7aad.

Haddiise ay dhacdo laguma dhawaaqo ee waa la xadfaa.

Miisaanka Beydka Hees Mooye

alan	+ Sh.Dh.	= Wadarta	Rugta Shaqal dheer.
6	+ 2	= 8	alanta 3aad, 5aad (waa shardi in laga helo beyd waliba)
6	+ 3	= 9	alanta laad (shardi ma aha)
7	+ 2	= 9	2°, 4°, 5°, 7° (waa ka xaraan)

N.B.

Eeg bogga lambarkiisu yahay () waxaad ku arkidoontaa Hees mooye wax yar qaynuunkiisu ka duwanyahay midka kan hase yeeshee, beyd haddii guud ahaan aad u eegto waa 9 alanle kaliya ah, marka kama foga qaynuunkaan.

Ga	-	ca	-	loy	ga	-	ca	-	loy	6 + 2
1		2		3	4		5		6	

Ga	-	can	-	tay	mi	-	di	-	gey	6 + 2
1		2		3	4		5		6	

A	-	far	kaa	-	ga	di	-	gaa	6 + 2
1		2	3		4	5		6	

Kaa	-	ga	day	-	ri	-	ya	-	yaa	6 + 3
1		2	3		4	5		6		

Ha	-	bar	-	laa ^c	-	we	nin	haa ^o	-	yo		7 + 2
1		2		3		4	5	6		7		

Ha	-	bar	weyn ^o	nin	la	-	haa ^o					6 + 2
1		2	3	4	5	6						

Ha	-	bar	-	tiis ^o	ni	-	may	joog ^o	-	to		7 + 2
1		2		3	4	5	6	7				

Hablo kay la dhasheen

Habarlaawe koryaa

Habar weyn la furaayaa

Hablo guursa ~~daa~~ da'aa

Hooggu waa habartiis

~~Mu hoggaan la wareego~~

Mu hoggaan la wareego

Mu haruurku biyeeyo

Hor banaan ha ahaado

Yaan lagaaga horrayn

- - o o - -

Guur haddaad u haw~~ee~~to

Halka dheerna ha guurin

Halka gaaban ha guurin

Dhex dhexaadka nimood

Oo dhex~~aadka~~ ~~ni~~ looga dhacaayo

Door ahaa la daydaa

Halka dheerna na guurin

Maantay gaajo timaad

Dhaxda uu ka jabaa

Muska uu is bilqaa

Waase baahi darteed

Waa bukaa ku yiraah

Halka gaaban ha guurin

Maantu gella cadhoowa

Garbahiisa na gaaro

Gunduhuu ka dhayaa

Dhex dhexaadka nimood

Dhexda looga dhacaayo

Door ahaa la daydaa

Kaas haddad heli weydo

Halka deerda deggayo

Markay gaajo timaad

Wabar ku jibinaayo

Door ahaa la daydaa

Halka duurka dagaaya

Sibi geel ku canaanta

Door ahaa la daydaa

Halka roofta dagaaya

Giirrow soo bargaahayo

Door ahaa la daydaa.

- - - - o o - - - -

Alla yay la tumooy

Ila taakuleeyooy

Karka uu cad caddaado

Alla yaa iya taabooy

- o -

Kasaabooy cad caddooy

Gaana geel ka caddooy

Culinaa ku cuneeysa

Iyo caalin wadaad

Iyo oideyda eoddeed

Iyo ooofla barbaar

Iyo roor curadkiis

- - o - -

Halalkaan wecelood

Maiba geel laga keenay

Ma ahaa hidin waayooy

Hacartay la filoobay

Oo horaad walaalobay

La tunne ha tunnaato

La caddee ha caddaato

Culimaa cunidoonto

Iyo caalin wadaad

Iyo reer curadhood

- - o - -

I hi hees ee ahayn

Waa ku hees baranaayey

Nadda waa la habroobey

Waa horaad balagoobey

Hooyadey hal ma dhaami.

- - o - -

Badarow wad caddow

Caano geel la caddow

Culina ku cunee

Iyo ciddeenna barkeed

- - o - -

Badar yaa tu ayee

Yaa tunaa tunayee

Gabar iyo geroob

Laba reeso mirood

Gal weyn bahaarood

Waa ku hees ee ahayn.

Bar haddaan gabay naa o

Gabay noorahay naa o

Oon gunuunac bilaabo

Geeduhu wey lushaan

Geenyo waa danantaa

Geelu waa ololaa

Gaari waa tirataa

Geesi waa roentodaa

Anna waxyaka jalyaa.

- - - + o o - - - -

Heeskaan soo socdaa waa nooc ka mid ah hees nooye oo wax yar ka duwan/ sharcigii aan horay u soo aragnay. Saas ay tahay waa la mid, waa o beydkiisu wuxuu ka kooban yahay 9 alan iyo shaqal dheer laysku daray. Waxa u ka geddiisan yahay waa alnada iyo shaqal dheerayaasha tiradooda; waxayna kala ee noqon karaan sida shaxdaani ina tusinayso.

Miisaanka Beydka H. Mooyaha noociisa labaad

alan	+ Sh.Sh.	= Wadarta	Rigta shaqal dheerayaasha
5	+ 4	= 9	1°, 3°, 4°, 5°.
5	+ 3	= 8	(1°, 3°, 6°) ama (1°, 2°, 6°)
"	" "	" "	(1°, 5°, 6°) ama (4°, 5°, 6°)
7	+ 2	= 9	(6°, 7°) ama (1°, 7°) ama (4°, 7°)
8	+ 1	= 9	baad

Go	-	dad	-	lo	go	-	dad	-	lee	-	yow	7 + 2
1		2		3	4		5		6		7	

Go	-	dad	-	le	xii	-	saa	-	low	6 + 3
1		2		3	4		5		6	

Guun	a	-	lee	-	laa	-	yoew	5 + 4
1		2		3	4		5	

Gaa	-	ri	dhaan	-	dhaan	-	show	5 + 4
1		2	3		4		5	

Ga	-	cal	-	la	-	day	e	-	ri	-	yeey	7 + 2
1		2		3		4	5		6		7	

Gabar yaruu gubayuu

Gogosha ku cadheeyuu

Way i gabtaa yidhiyeey

Soo galyoo guuxyee

Sii baxiyoo xeenyeey

Rubadka ka cadhooboow

Kii gaaray gubayoow

Qaar igu qaadayeey

Qawda iga saaryeey

Bawlad ii dhiibyeey

Beesa beeseeyeey

Beesad waa caanooy

Beesad waa hilibeeey

Beesad waa dhuxuleey

Beesad waa subageey

Beesad waa sonkoreey

Beesad waa ~~shaa~~ shaahee

Beesad waa milixeeey

Beesadii madhateey

Buuri keen yihdiyeey

Ma hayo baan idhiyeey

Bawda iga jebiyeey

Qaaddiyoow maqaleey

Wuu isoo dilayeey

Waan ka soo dudayeey

~~Waan ka soo~~ Qaadi waa qorqodahaasi

Qaadiyow iga ruraa

Qaadi mawlaanow

Gacanba uma qaadine

Way gadaadootoo

Waa gaday barateee

Garow ha ii karisee

Qaadi gabadha/ ii celi.

HEES CAANOOD

Heestaan waxaa la qaadaa kolka caanaha la lulayo waxayna gooni u tahay dumarka. Maadaama aanay naantu si rudud subagu soo saarin qofka ruxayaa si aanu u dallin buu hees isku maaweeliyaa, isagoo aqoonta beer dulacsanayo, ka eed sheeganaya marna dhaawayo. Heesasoo socda baa si cad loogo dareemi karaa siyaabaha kala duwan oo ruxaha iyo haantu isu kal gacalsadaan ama collaabaan.

Miisaanka Beydka

Beydka hees cannodku waa tobanle (10) alamada iyo shaqal dheerayaasha isku jirkoodu.

Beydka dhif ahni waxay noqon karaan sagaalle (9) iyo koow iyo tobanle (11).

Rugta shaqal dheerayaasha qaar waa go'anyihiin qaarna way is bed beddelaan.

alan	Sh.Dh.	Wadar	Rugra shaqal dheerayaasha
6	+ 4	10	alanta (1°, 2°, 4°, 5°)
7	+ 3	10	Way is bed beddeshaa
8	+ 2	10	alanta (3°, 7°) ama (3°, 5°)

Caadi ma aha

8	+ 3	11	alanta
9	+ 2	11	alanta (1°, 3°)
9	+ 1	9	alanta (3°)

T u s a a l e : (6 + 4 = 10)

Baa - yeey bul - looy ii bax
1 2 3 4 5 6

6 + 4 = 10 (R. 1°, 2°, 4°, 5°)

Waa bee - la cee - bee - da
1 2 3 4 5 6

6 + 4 = 10 (R. 1°, 2°, 4°, 5°)

T u s a a l e : (7 + 3 = 10)

Geel ji - re ku qoo - raan - sey
1 2 3 4 5 6 7

7 + 3 = 10 (R. Ma sugna)

T u s a a l e : (8 + 2 = 10)

La - ba qaa - lin ku - la buub - tay
1 2 3 4 5 6 7 8

8 + 2 = 10 (R. 3°, 7°)

Inta caadiga ahayn

T u s a a l e : (8 + 3 = 11)

Waa ma - xay is - guun - guun - ku
1 2 3 4 5 6 7

7 + 4 = 11 = 11 (na sugna)

T u s a a l e : (9 + 2 = 11)

Waa ma - xay is - ga - ba - li - xis - ku
1 2 3 4 5 6 7 8 9

9 + 2 = 11 = 11 (1.1°, 3°)

T u s a a l e : (8 + 1 = 9)

Ma fi - yoo - bi - de o - gi - ye
1 2 3 4 5 6 7 8

8 + 1 = 9 = 9 (R. 3°)

1. Laba qaar laguu kala jar

Laba gaalin kula buubtay

Geel jire ku gooraansay

2. Ma fayobidee o'riye

Ma furtaa lagaa dhuugey

3. Haan yahay siddi gododle

Gododleha Garaad Faarax

Waa maxay isguunguunku

Waa maxay isgoed saarku

Waa maxay isgabalixisku

4. Gacantayda kuma saarin

Gacalkeyna imasiinin

Waa goror aan xooleyey

Aaan guri ka soo qaaday

5. Baayeeey bullooy ii bax

Waa bella ooobode

Ayaan suba'e laa bidin

32 Haanyahay shir dhigo dhubar jar

Waaqii dhamaaryooway

Riidihi dhamaarsadee

Waa lay dhibayaayee

He"sow ma dhamaanaatid!

Haanyahay dhatnisi ii bax

- - - o o - - -

Haanyahay bullooy ii bax

Yaan subaga lay bidinee

Oo yaad siisay lay oran

Gacantayda kuma lulan

Gacalkaynana ima siinin

Waa porof aan kalaayey

Oo gurii ka soo qaday

Geel jir ku qooraansay

Geed dheer la'aa soo lul

Laba qaar la'uu kala sid

Laba qaalin kala buubtay

Oor dhaadhaadnaa doonay

Geel dhaadhaadnaa doonay

La'aa la'aa la'aa la'aa

Haantu ayadoo door ah

Oo doobi leh badiis leh

Bay dooro doorowday

Oo doobi laga waayey

Dooradu raryow daran

Baay~~ay~~ bullooy ii bax

Yaan soo tax lay orone

Yaan subar cad lay furine

Yaan subar mun lay bidin

Haanyahay dhiqhdigo dhabar war

Haanyahay dhallaan qoqois

Waagii dharaaryowye

Boomana dhanaanaatid

Ma fiyoobidi oxiye

Ma furkaa lagaa dhuugay

- - - o o - - -

Heestaan waxaa la qaadaa marka la falkinayo ama la dhabayo kebadde. Waxaa loo tiriya, sida hees caanoodka, si aan loo da-reemin daalka hawshaas ka yimaado. Waxayna u gaar tahay dumarka. Kurtida heestani waxay ka hadlaysaa hawsha kebadde iyo wixii la xiriiro sida gaalka, roobka, mayraxda iyo ~~eask~~ cawska.

Dhiska Beydka H. Kebdeed

Heestani si bay uga duwantahay maansada inteeda kale, xagga dhiska, Maayo laba siyoodbaa waa loo tirin karaa beydkeeda.

1. Mar la tiriyo almada keliya, iyadoon lagu dhamaystirin shaqal sheerayaasha. Sababtuna waxay tahay, tirada alamada beydkeedu ma aha, sida maansada inteeda badan, wax marna badanayo marna ya-raanaya, markaasoo tirada lagu dhamaystiro shaqal dheerayaasha.

2. Marna waxaa tirada almada lagu derikaraa tan shaqal dheerayaasha. Maadaama tirada alamadu aanay is rog rogid badnayn, tan shaqal dheerayaashuna waa sidoo kale.


Hees kebdeedku laba nooc ayuu u kala baxaa, taas ay tahay guud ahaan way isu dhowyihiin xagga dhiska iyo luuqadaba. Farqiga u dhexeeyana waa kan:

B) Nooca hore, waxaa laga yaqaanaa xagga Waqooyi (Gaalkacyo inta ka shishayso).

Heestu laba laba beyd bay isu raacdaa.

1. Beydka hore wuxuu ka kooban yahay 10 ama 11 alan(marar aad u dhif ahna 12). Wuxuuna u kala baxaa laba shadar. Shadar-kiiba wuxuu noqon karaa 5 ama 6 alan, haddiise wadarta alamada beydka (oo ahaa 10 ama 11) lagu daro tirada shaqal dheerayaasha waxay noqon karaan: 14, 15 iyo 162-
2. Beydka dambe uma kala baxo laba snadar, alamadiisuna waa 8 ama 9. (mar dhif ahna waa 7) kolkaan tirada alamada ku darno shaqal dheerayaasha wadartu waxay noqonaysaa 11 ama 12.

Beydka Hore

Tirada alamada snadarka hore	Tirada alamada snadarka dambe	Wadarta alamada	
5	5	10	Haddii lagu daro
6 	5	11	tirada shaqal dheera
6	6	12	yaasha, beydka wuxuu noqon karaa 14,15,16.

Beydka Dambe

Tirada alamada beydka oo idil	Tirada shaqal dheerayaasha	Wadarta alamada & Sn.Dh.
8	3	= 11
	4	= 12
9	2	= 11
	3	= 12
7	5	= 12

T u s a a l e: (Beydka hore)

Saa - wa saa - wee - yo sa - gal a - roor - yow (5+5=10)+5=15)
1 2 3 4 5 1 2 3 4 5

Gee - si geel kee - ni - yio gaa - ri xi - ra - taa (6+5=11)+5=16)
1 2 3 4 5 6 1 2 3 4 5

Geed - ba geed - ka u dheer la - ga ga - raa - ca - yey (6+6=12)+4=16)
1 2 3 4 5 6 1 2 3 4 5 6

Wa - xa - yaa - ba - yoo i - la xu - maa - doo (5+5=10)+4=14)
1 2 3 4 5 6 2 3 4 5

T u s a a l e: (Beydka Dambe)

Jab - tooy jaw - gu waa roo - bee 7 + 5 = 12
1 2 3 4 5 6 7

Si yaab a - qal - ka loo saar - yee 8 + 4 = 12
1 2 3 4 5 6 7 8

Bi - dhaan dheer - re roob - ba - ri - ye 8 + 3 = 11
1 2 3 4 5 6 7 8

Xum - ba - da i - dan - ka joo - gaa - ye 9 + 2 = 11
1 2 3 4 5 6 7 8 9

Il ba - ri la - gaa - ga soo or - yee 9 + 3 = 12
1 2 3 4 5 6 7 8 9

- - - o o o - - - -

1. Waa kan soo biligee

Baarka ka onkaday

bidhaan dheere roob bariye

2. Naagan daah rogamee

daca daloollee

ninkeed dabeel raacyee

3. Naajan daah xiranee doca dolooleey
Tukuhu doocyo doocyayee
4. Waa madiixayoo Ilah maraayoo
maraaree ka xoeraayee
- 52 Waxaa yaaboo ila xumaado
xumbada idanka joogaaye
6. Geedba geedka u dheer caga garaacyeey
galool muray mullaaxidiiyeey
7. Geesi geel keeniyo gaari xirataa
Galool loogu daahaayeey
9. Awdal laga keenyee ~~wada seejuuryeey~~ alalag dheeree
~~Si yaab aqalka loo saaryee~~ il bari lagaaga soo oryee
10. ~~Saaxil~~ lagaa keenyee wada seejuuryeey
si yaab aqalka loo saaryee
11. Ninkii bah yar bay ka baylihiyeey
bulxan makaa yeerey baalaha
12. Baarqa-b waa seedo xiriba maynee
sagaal jir aan irmaanaynee
13. Koroonkor cunimaynoo kariba maynee
karuur geel ma la hayaayeey

T) Jaadka labaad ee hees kabdeedka waxaa laga yaqaanaa Go'bolka

Banaadir, Shabeellaha Dhexe iyo hareerahooda.

Beydka heestu ma kala dhaadheera. Beydkiiba wuxuu ka koobaa

naan karaa 10 ama 11 alan. Haddiise tirada alanta lagu bii-

riyo shaqal dheerayaasha waxay wadartoodu noqotaa 14,15,16.

Beydka haddaad u sii fiirsatid xagga dhiska waxaad moodaa

inuu leeyahay laba shadar oo kala dheer.

Shadarka hore, mar walba waa 4 alanle, shadarka dambese waa

inta beydka ka hartay, waxay noqon karaanna 6 ama 7 alan.

Tirada alamada Shadarka hore	tirada alamada Shadarka dambe	Wadarta alamada	
4	6	10	Haddii lagu daro tira- da Sh.Dh., beydka wuxu noqon karaa:14,15,16.
4	7	11	

T u s a a l e:

Sed - dax bi - lood see - di - taal i - go soon - raad 11+5=16
1 2 3 4 5 6 7 8 9 10 11

Sin - tee - da tiil dhanb - bel saar ku joo - go 10+4= 14
1 2 3 4 5 6 7 8 9 10

kus - lin al - low te - hor way - ru lee - to - har 11+3= 14
1 2 3 4 5 6 7 8 9 10 11

Dhab - ba - li - sii la - qan - waa - jey sha - na - doon 11+4= 15
1 2 3 4 5 6 7 8 9 10 11

1. Dhabba~~i~~ikii Is dhawrooy dhamaadon
 Ya kooj waa in dhamaato kaa dhi ay
 Dhudhun iyo taako murgoo ta'teenaa
 Bida dhal aan shalay aan dhukooda

2. Sedax bilood seeditaal iyo soonqad
 Sinteeda tiil dhabbal saar ku joogo
 Muslim allow nahar mayru leedahay

3. An waa jeclaa fine dhoereheyga
 juq ii galaa janaw ii sariibaa

4. Xil na kasaan xidid dhowra maayeen
 Xididdadood Allow mameeyee

5. Godden belbod dhabbal saar ku jooraan
 sinteeda tiil sacna waa sugaysay
 Muslim Allow nahar mayru leedahay

HEES CARUUREED

Heestaan waxaa la qaadaa kolka ay hooyadu dooneyso in ay see-
xiso ubadkeeda. Kolka ay qadayaana cunugga dhabarka ama dhabta
ayeeey ku sidaa iyadoo ruxayso, ama sariirtuu jiifi karaa. Ca-
muurtuna aad bay uga heshaa, wayna ku huruddaa.

Dhiska Beydka Hees Caruureedka

Dhiska beydka hees caruureedka waddanka la'a yagaan waa isku
wada mid in yar mooyee, oo beydku wuxuu badanaaba ku dhisan yahay
11 alan iyo shaqal dheerayaal lagu daray. Beydad aad u yarna wa-
xay noqon karaan tobanle (10) ama laba iyo tobanle (12).

Ogoow mar badan bay dhici kartaa inay heestu ku bilaabata
mus beyd ama eray keliya oo magac dhow ah sida: Maandhay! Marka
looma tirinkaro beyd ee waa hal qabsi lagu hagaagsanaayo heesta.

L.	Alanta	Sh.Dh.		L.	Alanta	Sh.Dh.
1	7	4	10	5	8	2
2	8	3		6	9	1
3	9	2	12	7	9	3
4	10	1				

T u s a a l e: $\frac{7 + 4}{11}$

$\begin{matrix} \circ & \circ & \circ & \circ \\ \text{Ma} - \text{x} & \text{a} & \text{d} & \text{wey} - \text{d} & \text{o} & \text{d} & \text{u} & \text{waa} - \text{l} & \text{a} & \text{n} \\ 1 & 2 & 3 & 4 & 5 & 6 & 7 \end{matrix}$

T u s a a l e: $\boxed{8 + 4 = 11}$

Si - dii bur - cad loo ba - saa - say
1 2 3 4 5 6 7 8

T u s a a l e: $\boxed{9 + 2 = 11}$

Mi - yaan ka - gu goo - hay ga - cal - le
1 2 3 4 5 6 7 8 9

T u s a a l e: $\boxed{10 + 1 = 11}$

Am - ma go - dad - li - ye min - ya - ra - dii
1 2 3 4 5 6 7 8 9 10

T u s a a l e: $\boxed{8 + 2 = 10}$

Bas - ra bee - la i - dil dhaa - ney
1 2 3 4 5 6 7 8

T u s a a l e: $\boxed{9 + 1 = 10}$

Dad - ka tan u - gu bi - lic ree - ney
1 2 3 4 5 6 7 8 9

T u s a a l e: $\boxed{9 + 3 = 12}$

Si - dii wa - xaan aab - ba ko - ri-nin
1 2 3 4 5 6 7 8 9

- - - - o o o - - - -

basra beela idil dhaaney

Dadka tan ugu bilic rooney

san canbaro dhasneediye

Baabuurro guuxaayiyo

Baxsanow gammaankiyo

Buntukhyaa lagaa bixin

- - - o O o - - -

Sidii waxaan aabbe korinin

Abaudisiyooy la oranin

Ayeeyooyin isu dhiibin

Abeer dhalay loo lisaynihi

Abaartii subag la siinin

Maxaad awda ugu raagtay

- - - - o O o - - - -

Sidii biyo loo harraaday

Sidii burcad loo basaasay

Sidii barax maalin geeddi

Bilaney loo baahayey

- - - - o O o - - - -

Maxaad weydood u waalan

Maxaad anna ii wareerin

Yaa hawayin

Ha waayin ha waayinnee hay

Wanaagsan hooyo

Haa waayin wax siiye aabbo

Haa waayin walaala dhowr ah

Ha waayin intii wax kuu ah

Ha waayin waxaad ku raysid

- - - - o O o - - - -

Sidii guuguule yeeshay

Amma ~~guumeys~~ guumeys mar curatay

Amma godadliyo minyaradii

Miyaan kugu gooyay gacalle

- - - - o O o - - - -

Ducaysane gacal daryeele

Duleed marti kagama seexde

Dadkiisaba daadaheeye

Jax loo diray darafta laace

Dareemada Cali kabloowa

Dixida gaaroodiyoo waa

Bilowa bilow hooyadii

Bilow loo baahayow wa

Bilow beel muuriyow wa

Sidii bilanow bel dhalatay

Sidii biyo loo harraaday

Sidii barax maalin geeddi

Sidii burcad loo basaasay

Bilow hooyadi bilowa

- - - - o O o - - - -

Sidii gododliyo minyarade

Sidii guun wiil ku curatay

Sidii geel xera ku raagay

Miyaan kugu hoohay gacalle.

- - - - o O o - - - -

Hooyow arbow

Arbow aaragudahayow

Markaad xalay gaylinaysay

Eaa guutaa kala horjeogtay

Ma geel baad xera u weyday

Ma gaas baad gaybinaysey

Ma geenyaa ka mirootay

- - - - o O o - - - -

Hees caruureedka inta yar oo aan waafaqsaneyn qawaaniinta
guud, waxaa ka mid ah heesahaan soo socda oon ka qiima liidan
kuwa kaleba:

Maandhow, tolkaa wuxuu kuu tirsanayaa	(11 + 6 = 17)
Intaad tiraab iyo tuuryo leedahay	(11 + 4 = 15)
Anna tolkay wuxuu kuu tirsanayaa	(11 + 3 = 14)
Inaad u tuurtaa ahal tuugmo weeyee	(11 + 5 = 16)
Tibey sitaan arladay tibaaxaan	(10 + 5 = 15)

- - - - o O o - - - -

H E E S C I Y A A R E E D

Hees ciyaareedku waa nooca maansada ugu faca wayn, Sidaan ho-
ray u soo sheegnay ciyaaro aad u fara badan oo kala duwan baa dal-
keena laga dheela mid walibana heesa gooni ah bay leedahay.

Intaanaan ciyaaraha dhex gelin aynu is waydiino: waa maxay ciyaari,
xaggee baysa ka timid?

Ciyaaruhu waxay u kala baxaan laba jaad, Mid diin ka soo jeeda iyo mid farxad iyo dabaal deg loo tunto.

Labadoodana waxaa fac wayn midda hore.

Aadanaha markii ay ka horyimaadaan waxyaaba naftiisa halis
geliyaa waxay ku beeraan cabsi, naxdin iyo argagax, wuxuuna isku
dayaa inuu la dagaalamo dabecadda dulaanka joogtada ah ku hayso.
Hadduu ku guulaysan waayo legdanka dabecadded wuxuu isku dayaa
inuu u talo mar marsiiyo naftiisa ku qanciya guuldarrada ka raac-
day dagaalka degaankiisa.

Dadku mar sii uu garan waayay una taag waayay fenoominayaalka ay ka mid yihiin: dhulgariirka, cucurka, dufaanta, daadka, abaaraha, buraca, damalka i.w.t.. ayuu isku raaweeliyay inay jirto awood ka addo kana baraysa oo ras'uul ka ah muldaradiisa. Si uu uga nabad-alo caro iyo ci-aab tanna Billiga'ee innu caabudo markaa's oo u nabad-alo in ay abaal ka geydarsan la awoodo baraysa, loogu dhaqmo

Dadna wuxuu ka mid kaaliso uga jiraa wuxuu u kala saaray kuwo
maanta iyo shabaadaha is u dhacdo, si ilaahyada ama ruuxaa-
mada caradooda loogu qaboojiyo iyo kuwa arwaaxa iyo dabaaldega loo
dheelo sida xiligga barwaaqada iyo guul ugaareedka.

Maddii qarniyadkii hore ciyaaruhu diin salka ka hayeen yaahu'
iyo mabadaa ruuxaanoodna loo dheeli jiray, waanta way dhalan roymen
gaarood oo waxay is roymen wax naad iyo maawelo loo adeegsado;
inkastoo kuwa Boobaha, Min iyo, Kamaadka iyo Booranihu ka mid
jiray weli qaybtaas loo adeegsado wax ayoo dhalan loo ciyaaro
si loo qabado caradooda iyo awooda.

Ilbaxnimadu ciyaar diineedka way naad gaddaa waayo waxay ku til-
maanta khuraafaad, si ay u sii cimri dheereystaanna qaar baa diinta
Islaanka isku saaray, sida Kamaadka iyo Booranihu, qaarna weli isna
dhalan roymen sida Dabshidka, Bullada iyo ~~eti~~ istunka.

Ciyaar diineedka waxaa lagu qaybsaa bururka qabta qof ciyaar-
tooda ka mid ah sida Gaarka. Brayga Gaar ahi wuxuu nooca yimid ka-
ga Kabaashada wuxuuna ahaa ilaa ay caabudi jireen oo la oranjiray
Zaar, inaguna waxaan u roymen Gaar waayo codadkeena kuwa jirto " 2 ".
Ciyaaro diineedka soo socda waa kuwa dalkeenna ugu caansan, qaar
da' wayn, qaarna waa farac danbe.

1. Dabshid

2. Beebe

3. Gaar

4. Gaaradde

- | | |
|----------------|-------------------------|
| 5. Saar lugood | 6. Saar mooye |
| 7. Jumato | 8. Xayaad |
| 9. Istun | 10. Mingis |
| 11. Boorane | 12. Ardooyin (wadaadda) |
| 13. Saar fadhi | |

Ciyaaraha caanka ah oo tumashada waxaa ka mid ah:

- | | |
|--------------------|----------------------------|
| 1. Battar | 2. Beerey |
| 3. Daba fadal | 4. Diikow |
| 5. Dowla damiin | 6. Walsaqo |
| 7. Gabley Shimbir | 8. Waalo |
| 9. Or Dheere | 10. Makahow |
| 11. Saylaci | 12. Jaariile |
| 13. Daadooy | 14. Mariini Basbaas |
| 15. Walla - Walley | 15. Hurdadiid, tur |
| 17. Shirib | 18. Bulle |
| 19. Heelley | 20. Hirimaale hana haybsan |
| 21. Helelewaale | 22. Hirwo |
| 23. Kabeeyey | 24. Walsaqo |
| 25. Wil Willey | 26. Hirikow |

Kiisaanka hees ciyaareedka ma laha qaamuun guud waayo gobol walba waxaa laga yaqaan jaadad gooni ah sidaas awgeed way adagtahay in sharci go'an la siiyo sida noocyada kale oo maansada, in ~~mid-wal~~ mid walba gooni loo baarayo mooye inkastoo ay tobanle u badan yihiin.

Hees Durbaan.

- Walaaleey gacalisoo	$7 + 3 = 10$
Gadeysaa lay dhahaa	$6 + 4 = 10$
GEDDOY WALKI LOOLA TEGIN	$8 + 2 = 10$
Haddaan galo gelin dhexaad	$8 + 2 = 10$
Glaayradu waa ciyaan	$7 + 3 = 10$
Bannaan jiif waa baqaa	$6 + 4 = 10$
Waxaa n badiye ku nacay	$8 + 2 = 10$
Waxaan beledkii ku nacay	$8 + 2 = 10$
Waxaan odayaal ku nacay	$8 + 2 = 10$
Waxaan inankii ku nacay	$8 + 2 = 10$
Waxaan aqal weyn ku nacay	$8 + 2 = 10$
Waxaa baadiye ku nacay	$8 + 2 = 10$
Harraadkiyo hawsha badan	$8 + 2 = 10$
Waxaan beledkii ku nacay	$8 + 2 = 10$
Wax baas oo buug ku yaal	$6 + 4 = 10$

- Waxaan inankii ku nacay	$8 + 2 = 10$
Bar duunyaan loo aqoon	$6 + 4 = 10$
Waxaan aqal weyn ku nacay	$8 + 2 = 10$
Asaasoo yuu aradin	$7 + 3 = 10$
Bilaadeey ina adeer	$7 + 3 = 10$
Bilaash kaalay igu raac	$7 + 3 = 10$

Ciyaar Haanood.

- Hablow cay iyo ammaan	$7 + 3 = 10$
Caloo shayday hurdaan	$6 + 4 = 10$
Middee baa caashaqdeen?	$6 + 4 = 10$
Middeen cawda u goglaa?	$7 + 3 = 10$
Sidii koorweyn halaad	$6 + 4 = 10$
Kor iyo hawd sare ka timid	$9 + 1 = 10$
Kulayl badan baan qabaa	$7 + 3 = 10$
Shimbiro geed wada koraa	$8 + 2 = 10$
Midiba cayn bay u cidaa	$8 + 3 = 11$
Carro ba waa camaladee	$8 + 2 = 10$
Illayn lays ma cod yaqaan	$7 + 3 = 10$

- Halbaa hilin igaga jaban	$9 + 1 = 10$
Hilbaha yaan ka ceshadaa	$8 + 2 = 10$
Habeenkii ka ma iulmoodoo	$8 + 2 = 10$
Dharaartii ka ma hadhgalo	$8 + 2 = 10$

Sankaa qori igaga jabay	$9 + 1 = 10$
Sintaa midig baan ka jabay	$8 + 2 = 10$
Ilbaa saxar igaga dhacay	$9 + 1 = 10$
Haduana waan soconayaa	$8 + 2 = 10$

B a t a r:

- Samasamiyo siraad u egeey	$9 + 1 = 10$
Sonkor dhagax sideedii	$7 + 2 = 9$
Rabbow, yaa siiba oo liqa	$8 + 4 = 12$
Carmal guursadaa mooyee	$7 + 4 = 11$
Cadriyadda cunaa mooyee	$8 + 3 = 11$
Cagta soo ma rogi karo	$8 + 1 = 9$

Sacab inuu dad Bari yahay	$9 + 1 = 10$
Dad na inuu annaga yahay	$9 + 1 = 10$

- Awal ba waw dareen qabay	$8 + 2 = 10$
Inay ~~dunya~~ geel tahay	$7 + 3 = 10$
Duur inuu caleen yahay	$7 + 3 = 10$
In dareemo caws tahay	$7 + 2 = 9$
Awal ba waw dareen qabay	$8 + 2 = 10$

S a a r:

- Adduunyadu waa haween	$7 + 3 = 10$
Halkaan layskuma haye	$7 + 3 = 10$
Middoonaaba ha hadlee	$7 + 3 = 10$
Hooyadu waa lama huraan	$8 + 2 = 10$
Marada ay nagu hantiday	$9 + 1 = 10$
Haddaan hoos uga dhacnaa	$7 + 3 = 10$
Wadnuhu bay ka hinqatoo	$8 + 2 = 10$
Calooshay ka calcashaa	$7 + 3 = 10$

Hooyadu waa lama huraan (Carees Ciise)

Qaboobey (bay).

- Biyaanoo biyaanoo	$6 + 4 = 10$
Bohol yerey biyoo wedee	$8 + 3 = 11$

- Iyeeyoy iyeeyow	6 + 4 = 10
La araw ma amaamade	8 + 3 = 11

Shirib (Banaadir).

	alan
- Seddax walxaato waa dadaal	8
Seddaxna Daaimaa yuwaad	8
Dugsi la oodo waa dadaal	8
Diinqaadna Daaimaa yuwaad	8
Dooful abuurro waa dadaal	8
Daruurna Daaimaa yuwaad	8
Dahaba guuri waa dadaal	8
Dadkana Daaimaa yuwaad	8

- - - - o O o - - - -

- Seddax walxaato waa muraad	8
Seddaxna waa maseer u yeel	8
marayyo shaashna waa muraad	8
Makaawi waa maseer u yeel	8
Musbaas yo maalin waa muraad	8
Masawacna waa maseer u yeel	8
Masaar yo yaambo waa muraad	8
Makiinana waa maseer u yeel	8

- - - - o O o - - - -

- Afar walxaata afareey	8
Uyuna aaladood yihiin	8
Qandiya ul dheer	8
Odayey aaladiis yihiin	8
Afar gocayo yo aleel	8
Oor geel ay aaladiis yihiin	8
Afar gamuun iyo aftaak	8
Ugaartay aaladood yihiin	8
Eeba il yara eyrba eyr	8
Igaaray aaladood yihiin	8

- - - - o o o - - - -

Ciyaar lagu ciyaaro Ceerigaabo.

- Xoolo waa geela oo gudha	=====	$8 + 4 = 12$
Dadna waa mugaal godan	=====	$7 + 2 = 9$
Caqlina waa kan aabahay	=====	$8 + 3 = 11$
Ciyaari waa tan igu maqan	=====	$9 + 2 = 11$
Ragga calooshiis la cayaar	=====	$8 + 3 = 11$
Iyo ciil kaw baxow daran	=====	$8 + 3 = 11$
Maagna ciirteed bogatiyo	=====	$8 + 3 = 11$
Casarkii seexataa u daran	=====	$9 + 2 = 11$

- - - - o o o - - - -

RAADRAAC

- Cabdalla Cumar Mansuur “Jaadadka maansada soomaaliyeed iyo afka maldahan” (Buugga qalinjebinta), Xamar 1975
- Abdalla Omar Mansur, “Il ciclo poetico di Ruga”, in Nuova Era, Mogadiscio 1976
- Cabdullaahi Diiriye Guuleed “Gorfaynta gabayga” Marka 1976
- Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye) “Miisaanka maansada” (qoraalo taxana ah) Xiddigta Oktoobar, Xamar 1976
- Andrzejewski G. & I.M. Lewis “Somali Poetry: an Introduction” Oxford 1964.
- Aw Jaamac Cumar Ciise “Diiwaanka gabayadii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan”, Akedemiyada Dhaqanka, Xamar 1974.
- Axmed Faarax Cali “Idaajaa”, “Ismaaciil Mire”, Akedemiyada Dhaqanka, Xamar 1974
- Xafiiska Manaahijta, “Suugaanta” Dugsiga sare, fasalka koowaad, wasaaradda Waxbarashada, 1976.
- Muuse Galaal: Cajalooyin maqal oo laga duubay Muuse Galaal isagoo ka sheekaynaya taariikhdiisii iyo gabayadii Ina Cabdulle Xasan (lixdameeyadii in laga duubay ayaan filayaa).